**Dawladda Federaalka Soomaaliya**
**Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare**

# Qaabdhismeedka Siyaasadda Waxbarashada Aasaasiga ee Degdega ah (WAD)

Muqdisho
Abriil 12, 2021

**BOGGA TUSMADA**

Hordhac ........ 3
Mahadnaq ........ 4
Ereyada la soo gaabiyey: ........ 5
Qeexitaanka ereyada muhiimka ah: ........ 6
1. CUTUBKA KOOWAAD: HORDHAC ........ 7
1.1 Hordhac ........ 7
1.2 Qeexitaanka Hawlgelinta Waxbarashada Aasaasiga ee Degdega ah (WAD) ........ 10
1.3 Xaaladda Siyaasadda iyo Sharciga ........ 11
1.4 Sababta Siyaasadda WAD loo Sameeyey ........ 13
1.5 Baaxadda Qaabdhismeedka Siyaasadda ........ 13
2. CUTUBKA 2AAD: QAABDHISMEEDKA SIYAASADDA ........ 14
2.1 Mabaadii'da Hagasya Siyaasadda ........ 14
2.2 Ujeeddada Guud ........ 16
2.3 Himilada ........ 16
2.4 Yoolka ........ 16
2. 5 Ujeeddooyinka ........ 16
3. CUTUBKA 3AAD: QODOBBADA SIYAASADDA ........ 17
3.1 Diiwaangelinta iyo Ansixinta Barnaamijyada WAD ........ 17
3.2 Wacyigelinta, Abaabulka iyo ka Qeybgalka Bulshada ........ 18
3.3 Hirgelinta Xarrunta WAD ........ 20
3.4 Dhismeyaasha Xarunta WAD ........ 21
3.5 Aqoonsiga Ardayda, Diiwaangelinta, Haynta iyo Taageerada ........ 21
3.6 Manhajka, Qaabka iyo Saacadaha Waxbarista ........ 23
3.7 Agabka Waxbarista iyo Barashada ........ 26
3.8 Qiimaynta Horumarka Ardayda iyo Bixinta Shahaadooyinka ........ 26
3.9 Shaqaalaynta, Hormarinta Xirfada, Qiimaynta iyo Abaalmarinta Baraha ........ 28
3.10 Kormeerka, Qiimaynta, Cilmi Baarista iyo Cadeymaha ........ 31
4. CUTUBKA AFRAAD: QORSHEYNTA IYO MAAMULKA SIYAASADDA ........ 32
4.1 Qorshaynta iyo Dejinta Miisaaniyadda ........ 32
4.2 Maamulka iyo Isku-dubbaridka Barnaamijyada ........ 32
4.3 Doorka iyo Maasuuliyadaha ........ 34
5. CUTUBKA SHANAAD: DIB U EEGISTA IYO WAX-KA-BEDDELKA SIYAASADDA ........ 39

# Hordhac

Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare iyada oo ka duulaysa xaqa uu aadanuhu u leeyahay waxbarashada, isla-markaana ogsoon in ku dhowaad 3 milyan oo carruur iyo dhallinyaro Soomaaliyeed ah ka maqan yihiin dugsiyada, waxa ay diyaarisay siyaasadda iyo manhajka Waxbarashada Aasaasiga ee Degdega ah (WAD) iyada oo gudanaysa waajibaadka ay u xilsaaran tahay sida uu dhigayo Sharciga Waxbarashada Qaranka (2017) oo ah ***"Taabbo galinta xaqa muwaadin kasta u leeyahay in uu helo waxbarasho lacag la'aan ah ilaa iyo dugsiga sare sida ku xusan qodobka 30aad ee Dastuurka KMG ee JFS".***

Hiigsiga fog ee laga leeyahay siyaasaddan waa xaqiijinta in carruurta iyo dhallinyarada dugsiyada ka maqan fursad loo siiyo inay helaan waxbarasho aasaasi ah oo tayo leh kuna habboon da'dooda. Mabaadii'da siyaasadani ku salaysan tahay waxaa ugu waa weyn in la helo waxbarasho tayo leh oo loo siman yahay.

Siyaasadda WAD waxa ay faahfaahinaysaa talaabooyinka lagu nidaaminayo habsami u socodka barmaamijyada, bar-tilmaameedka la hiigsanayo, heerarka kala duwan ee la marayo, habka loo gudbinayo addeega waxbarashada iyo mirodhalka laga filayo in ay ka soo baxdo, iyo weliba qaabka ay u wada shaqaynayaan dawladda iyo daneeyeyaasha kale ee ku hawlan waxbarashada.

Diyaarinta iyo dhaqangelinta siyaasadda iyo manhajka WAD waxa ay qayb ka tahay hawlaha muhiimka ah ee Dawlada Federaalka Soomaaliya ku hagayso sare u qaadidda iyo baahinta tayada waxbarashada heerarkeeda kala duwan iyo la-dagaallanka jahliga, waana talaabo wax weyn ku biirinaysa dib u dhiska iyo horumarka dalka. Arrintani waa talaabo muhiim ah, bilowna u ah safar iyo shaqo wakhti dheer soconaya, kaas oo ujeedadiisu tahay in dhamaan carruurta iyo dhallinyarada dugsiyada ka maqan la gaadshiiyo addeeg waxbarasho oo tayo leh. Wasaaraddu waxa ay diyaar u tahay inay dhamaystirto qorsheyaasha iyo agabka lagamamaarmaanka u ah dhaqangelinta siyaasaddan iyo manhajkeeda, iyadoo kaashanaysa saaxiibadeeda wadaniga ah iyo kuwa caalamiga ah.

Wasaaraddu waxa ay mar kasta u taagan tahay in ay si hufan oo sharciga waafaqsan u hogaamiso hawlaha iyo addeega waxbarashada, waxayna ku dadaalaysaa abuuridda jewi wada shaqayn iyo hufnaani ku dheehan tahay iyadoo dhamaan daneeyeyaasha kala duwan u fududaynaysa fulinta barmaamijyada ay ku hawlan yihiin. Hadaba, waxaan ku adkaynayaa dhamaan daneeyayaasha wadaniga ah iyo saaxiibada caalimaga ah ee Soomaaliya inay si niyad wanaag iyo firfircooni leh uga qayb qaataan dhaqangelinta siyaasadda iyo manhajka WAD.

Waxaan rajaynayaa in fulinta siyaasadda Waxbarashada Aasaasiga ah ee Degdega ah (WAD) iyo manhajkeeda ku lifaaqaan ay horseedi doonaan, inaan ka dhabayno hilimadeena oo ah gaadhsiinta addeeg waxbarasho oo tayo leh dhamaan shacabka Soomaaliyeed iyadoo dareen gaar ah loo yeelanayo kooxaha iyo qaybaha bulshada ee u nugul dhibaatooyinka.

Wada shaqayn wacan.

25/04/2021

Mudane Cabdullaahi Abuukar Xaaji (MP)
Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada Hiddaha iyo Tacliinta Sare
Abriil 25th, 2021

## Mahadnaq

Ugu horayn mahad oo dhan waxaa iska leh Ilaaha Raxmaanka ah oo noo suurtageliyey dhamaystirka siyaasadda iyo manhajka Waxbarashada Aasaasiga ee Degdega ah (WAD).

Marka xiga waxaan mahad iyo bogaadin u celinaynaa Hay'adda USAID oo maalgeliyey diyaarinta iyo ansixinta sayaasaddan iyo manhajkeeda. Sidoo kale waxaan u mahad celinaynaa Creative International iyo hawl-wadeenadeeda mashruuca ***Bar ama Baro*** oo si hawlkarnimo iyo hufnaan leh u fulinayey diyaarinta iyo ansixinta siyaasadda iyo manhajka WAD iyagoo mar walba wadashaqayn dhow la lahaa WWH&TS ee Dawladda Federaalka Soomaaliya.

Mahad gaar ah iyo amaan waxaa iska leh saraakiisha iyo aqoonyahanka ka hawlgala WWH&TS gaar ahaan waaxyaha Waxbarashada Dadban iyo Horumarinta Manaahijta oo si hagar la'aan ah u gutey waajibaadkoodii una hagayey heerarka kala duwanaa ee ay soo martay diyaarinta, dib u eegista iyo ansixinta siyaasadda iyo manhajka WAD.

Sidoo kale waxaan u mahadnaqaynaa la-taliyeyaashii naga caawinayey xaga farsamada, cilmi baarista iyo diyaarinta siyaasadda iyo manhajka WAD iyo sidoo kale madaxda iyo shaqaalaha Wasaaraddaha Waxbarashada ee Maamul Goboleedyada xubnaha ka ah DFS oo si balaadhan uga qayb qaatay wadatashiyadii lagu faaqidayey qaabdhismeedka siyaasadda iyo manhajka WAD ugu dambayntiina si buuxda uga qayb qaatay ansixinta siyaasadda iyo manhajka WAD.

Waxaan ku rajo weynahay in maalgelinta iyo dadaalkeena aan isu geynay uu dhali doono miro la taaban karo mustaqbalka dhow.

## Ereyada la soo gaabiyey:

| | |
|---|---|
| WAD | Waxbarashada Aasaasiga ee Degdega ah (Accelerated Basic Education - ABE) |
| GWB | Guddiga Waxbarashada Bulshada (Community Education Committee – CEC) |
| HII | Heshiiska Iskaashiga iyo Isfahamka (Cooperation Framework and Memorandum of Understanding - CFMU) |
| CN | Carruurta Naafada ah (Children With Disabilities - CWD) |
| GWD | Guddoonka Waxbarashada Degmada (District Education Officer - DEO) |
| WDhY | Waxbarashada loo Dhan Yahay (Education for All - EFA) |
| HMXW | Habka Maareynta Xogta Waxbarashada (Education Management Information System – EMIS) |
| GBW | Guddiga Bahda Waxbarashada (Education Sector Committee - ESC) |
| QSW | Qorshaha Siyaasadeed ee Waxbarashada (Education Sector Strategic Plan - ESSP) |
| DFS | Dawladda Federaalka ah ee Soomaaliya (Federal Government of Somalia - FGS) |
| MXF | Maamuladda Xubnaha ka ah Soomaaliya (Federal Member States - FMS) |
| TGDDh | Tiradda Guud ee Dugsiyada Dhigata (Gross Enrolment Rate - GER) |
| ICW | Iskaashiga Caalamiga ah ee Waxbarashada (Global Partnership for Education - GPE) |
| DGB | Dadka Gudaha ku Barakacay (Internally displaced persons - IDP) |
| UCDA | Urur Caalami ah oo aan Dawli Ahayn (International Non-government Organization – INGO) |
| DWW | Dib-u-eegista Wadajirka ah ee Waxbarashada (Joint Review of the Education Sector – JRES) |
| YHK | Yoolalka Horumarinta Kun-Sannadlaha (Millennium Development Goals - MDG) |
| K&Q | Kormeerka iyo Qiimaynta (Monitoring and Evaluation - M&E) |
| WW | Wasaaradda Waxbarashada (Ministry of Education - MoE) |
| WWH&TS | Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare (Ministry of Education, Culture and Higher Education - MoECHE) |
| SWQ | Siyaasadda Waxbarashada Qaranka (National Education Policy - NEP) |
| WD | Waxbarashada Dadban (Non-formal Education - NFE) |
| QHQ | Qorshaha Horumarinta Qaranka (National Development Plan - NDP) |
| UDA | Urrurada aan Dawliga Ahayn (Non-governmental Organizations - NGOs) |
| CDhDM | Carruurta iyo Dhallinyarada Dugsiyada ka Maqan (Out-of-school Children and Youth - OOSCY) |
| HHT | Habka Hubinta Tayada (Quality Assurance System - QAS) |
| GWG | Gudoomiyaha Waxbarashada Gobolka (Regional Education Officer - REO) |
| YHW | Yoolalka Horumarinta Waarta (Sustainable Development Goals - SDG) |
| WHM | Waaxda Horumarinta Macalimiinta (Teacher Development Department - TDD) |
| WFTX | Waxbarashada Farsamada iyo Tababaradda Xirfadaha (Technical and Vocational Education & Training – TVET) |
| DG | Dawlad Goboleedyada (Regional Government – RG) |

## Qeexitaanka ereyada muhiimka ah:

| | |
|---|---|
| Waxbarashada Aasaasiga ah ee aan Tooska ahayn | Macnaha ugu weyn ee odhaahda 'waxbarashada aasaasiga ah ee tooska ahayn' wuxuu tilmaamayaa dhammaan waxqabadyada waxbarasho ee ka baxsan habka dugsiyada rasmiga ah (oo ay ku jiraan waxbarashada lagu barto guriga, barnaamijyada diyaarinta, barnaamijyada gaarka ah ee carruurta hibada leh iwm). Marka la eego xaaladda Soomaaliya u gaarka ah, waxbarashada aasaasiga ah ee la dedejiyey waa talaabo kaabis iyo dhammaystir u ah addeegyada waxbarashada aasaasiga ah oo loogu talagalay carruurta ka maqan dugsiyada iyo kuwa leh baahiyaha kala duwan iyada oo ujeedaddu tahay sidii loo xaqiijin lahaa in qof walba uu helo adeegga waxbarashada. |
| Waxbarashada Aasaasiga ah ee Degdega ah (WAD) | Waa qorshe waxbarasho oo waqtiga lagu fulinayo la dedejiyey, lana siiyo hadba da'da ku habboon, loona fuliyo hadba sida ku haboon. Ujeeddada qorshahani waa in addeegyada waxbarashada la gaadhsiiyo carruurta iyo dhallinyarada dugsigyada ka maqan iyo kuwa ka weynaaday da'dii dugsiyada. Carruurta iyo dhallinyarada ay arrintani saamaysay waxaa ka mid noqon kara kuwa kuwa aan dugsiyada tegin ama waxbarashadoodii hakad gashay sababo la xiriira saboolnimo, faquuqid, colaad ama dhibaatooyin kale. Ujeedadda qorshaha WAD waa in ardayda la siiyo awood aqooneed oo la ansixiyey, una dhiganta waxbarashada aasaasiga ah iyada oo la addeegsanayo hababka waxbarista iyo barashada oo wax ku ool ah, islamarkaana la jaanqaadaya heerka garashada ardayda. |
| Xarunta Waxbarashada Aasaasiga ee Degdega ah | Dhismaha ama fasallada lagu fulliyo waxbarashada WAD. Ereyga 'Xarun' ayaa la isticimaalayaa qorshaha WAD halkii laga isticmaali lahaa ereyga 'dugsiga'. |
| Fuliyaha Waxbarashada Aasaasiga ee Degdega ah | Waa urrarada gacanta ku haya xarumaha lagu bixiyo waxbarashada aasaasiga ee degdega ah sida urrarada aan dawliga ahayn, urrarada bulshada iyo urrarada qurbajoogta. |
| Bare | Qofka wax baraya ardayda WAD waxaa loogu yeedhaa Macalin. |
| Arday | Carruurta ama dhallinyarada dhigata fasallada Waxbarashada Aasaasiga ee Degdedga ah (WAD). Eregyga 'ARDAY' waxaa loo isticmaalaa qorshaha WAD si loo muujiyo xaqiiqada qorshaha WAD. |
| Carruurta dugsiyada ka maqan | Waxaa loola jeedaa farqiga u dhexeeya iyo tiradda guud ee carruurta iyo dhallinyarada ee ku jira da'da waxbarashada iyo tirada runta ah ee carruurta iyo dhallinyarada ka diiwaan gashan ama dhigta dugsiyada hoose iyo sare |
| Waxbarashada Dadban | Waa hab fursadaha waxbarasho lagu gaadsiiyo dhallinyarada iyo dadka waaweyn si loo siiyo manhaj kale oo ku habboon oo loogu talagalay waxbarashada aasaasiga ah iyo tan dugsiga sare si loogu wanaajiyo laguna kaabo tayada barnaamijyada ku saleysanWwaxbarashada Dadban (WD) ee carruurta, dhallinyarada iyo dadka waaweyn ee aan awoodin inay raacaan waxbarashada tooska ah ee dugsiyada taas oo ay sababeen duruufaha guud ee adag ama duruufo gaarka u ah. |

# 1. CUTUBKA KOOWAAD: HORDHAC

## 1.1 Hordhac

### 1.1.1 Xaaladda Waddanka

Soomaaliya waxa ay soo martay tobanaan sano oo colaado ah kuna baahay wadanka oo dhan, waxaana uga sii daray masiibooyinka dabiiciga ah, arrimahaasi waxay saameyn ku yeesheen dhammaan qeybaha dalka. Ansixinta dastuurka ku meelgaarka ah ee Soomaaliya sanadkii 2012 waxay muujinaysay geedi socodka gaabiska ah iyo soo kabashada Soomaaliya iyo sidoo kale bilowga isbedel muuqda oo ku yimid jawiga siyaasaddeed markii la dhisay Dowladaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka (Jubaland, Koonfur Galbeed, Hirshabelle, Galmudug iyo Puntland ooh ore u jirtey) iyo Maamulka Gobolka Benaadir. Shantaas maamul goboleed, Maamulka Gobolka Banaadir iyo maamulka Somaliland ayuu ka kooban yihiin masraxa siyaasadda Soomaaliya.

Sanadkii 2014kii, dadka Soomaaliyeed waxaa lagu qiyaasay 12.3 milyan[1], iyada oo tiradda labka (50.7%) iyo dheddiga (49.3%) isku dhow yihiin. Ku dhowaad 42% waxay ku nool yihiin magaalooyinka, 23% waxay ku nool yihiin tuulooyinka iyo deegaanada yaryar, 26% waa reer guuraa halka 9% ay yihiin dad ku barakacay gudaha dalka (IDPs). Inta badan dadka Soomaaliyeed waa dhallinyaro oo 45% ay kayar yihiin 15 sano. Qiyaaso kale oo dhowaan soo baxay ayaa sheegaya in tirada guud ee dadka Soomaaliyeed ay tahay 15 milyan[2].

### 1.1.2 Xaaladda Waxbarashada

Soomaaliya, tiradda guud ee carruurta iyo dhallinyarada da'da waxbarashada ku jirta ee dugsiyada dhigata waa 33%[3] keliya, halka dugsiyada sare[4] ay dhigtaan 27% taasoo ah mida ugu hoosaysa marka loo eego waddamada gobolka. Isdiiwaangelinta dugsiyadu waxay u badan tahay magaalooyinka (60% Muqdisho iyo 55% magaalooyinka kale), waxaa ku xiga tuulooyinka (12%). Isdiiwaangelinta dugsiyada xerooyinka barakacayaasha waa midda ugu hoosaysa sida la ogyahay dalka oo dhan. Heerarka ku sugnaanshaha dugsiyada illaa Fasalka 5aad waa 64%[5], waxaana dugsiga sare u gudba 9%[6] taasoo muujineysa in ay qayb weyn oo carruurta ka mid ah ka baxeen dugsiga oo aysan dhammaystirin fasaladda waxbarashada aasaasiga ah. Heerarka ku sugnaanshaha dugsiyada aad ayuu u hooseeyaa gaar ahaan carruurta ka soo jeeda qoysaska saboolka ah, carruurta miyiga, gabdhaha iyo carruurta ka soo jeeda beelaha la faquuqo. Xogta hada la hayo waxay muujineysaa in ka badan 3 milyan oo caruur iyo dhalinyaro ah oo da`doodu u dhaxeyso 6-18 sano oo dugsiyada ka maqan. Sidoo kale 3% keliya carruurta qoysaska reer guuraaga ah iyo 17% carruurta[7] barakacayaasha ayaa ka diiwaangashan dugsiyada.

---

[1] UNFPA, 2014. Daraasadda Qiyaasta Dadweynaha ee 18-ka eek a horeeyey dagaalada sokeeye.

[2] Bangigga Aduunka ( World Bank Group) 2019. Xogta Dhaqaalaha Soomaalia. Halkan ka eeg: http://documents.worldbank.org/curated/en/811231567610111001/pdf/Somalia-Economic-Update-Fourth-Edition-Building-Education-to-Boost-Human-Capital.pdf.

[3] Qorshaha Horumarinta Qaranka (NDP) 2020-2024

[4] Tilmaamayaasha Waxbarashada ee Dadka Soomaallida (Education Characteristics of the Somali people Volume 3 UNFPA 2016). http://www.dns.org.so/docs/Analytical_Report_Volume_3.pdf

[5] Qorshaha Horumarinta Qaranka (NDP) 2020-2024

[6] Xogta waxbarashada (MoECHE EMIS January 2021)

[7] Xogta waxbarashada Barakacayaasha (Education Cluster calculations on IDP students based on UNHCR IDP population data and UNFPA PESS estimates of percentage of IDP children accessing education (17%).)

Marka carruurtu ay gaaraan 6 sano (da'da gelitaanka dugsiyada), 31% gabdhaha iyo 47% wiilasha ayaa dhigta dugsiga hoose. Dib u dhigista in carruurta la geeyo dugsiga hoose waa qodobka weyn ee sababaya in carruurtu dhaafaan da'da isdiiwaangelinta dugsiyada. Carruurta dugsiyada dhigata 11% keliaya ayaa ku jira da'dii saxda ahayd eek u haboonaydayd fasalka ay fadhiyaan, halka tirada guuda ay tahay 23%[8]. Cilmi baadhis ku saabsan heerka waxbarashada aasaasiga ah ee gabdhaha Soomaaliya ayaa lagu ogaaday in 67% gabdhaha iyo 58% wiilasha ay ka weyn yihiin da'dii waxbarashada ugu yaraan labo sano marka loo eego da'dooda fasalka[9] ku habboon. Tani waxay u muuqataa inay tahay arrin bulsho oo ay dad badan oo Soomaali ah aaminsan yihiin in carruurta da'doodu u dhaxeyso 6-9 sano ay ka yar yahiin inay dhigtaan dugsiyada taas oo keentay isdiiwaangelinta oo kordheysa marka caruurtu gaadho inta udhaxeysa da'da 10-19 sano. Fogaanshaha dugsiga iyo nabadgelyada uma muuqdaan inay arrintan saamayn ku leeyihiin.

Helitaanka waxbarashada waxaa caqabad ku ah arrimo is biirsaday sida saboolnimada, awood la'aanta waalidiinta ee bixinta khidmadaha dugsiga, dhismayaasha dugsiyada oo kooban iyo amni xumada. U sinaan la'aanta helida adeega waxbarashada waxay ka dhex jirtaa kooxo kala duwan oo carruur ah sida gabdhaha, carruurta barokacayaasha, carruurta naafada ah, reer guuraaga iyo carruurta tuulooyinka kuwaas oo si gaar ah xaaladoodu u liidato. Carruurta iyo dhallinyarada dugsiyada ka maqan waxay u badan tahay in ay la kulmaan xadgudubyada xuquuqda carruurta sida guurka hore, carruurta lagu shaqaysto, tahriibinta carruurta iyo xadgudubka galmada.

Carruurta naafada ah ee Soomaaliya xaaladoodu way qarsoon tahay waxaana aad u yar in ay helaan fursado waxbarasho. Inkasta oo dadka naafada ah lagu qiyaaso inay yihiin 5% dadweynaha[10], tirada carruurta baahiyaha gaarka ah leh ee ka diiwaangashan dugsiyada hoose waa 0.3% wadarta guud ee ka diiwaan gashan dugsiyada. Carruurta naafada ah waxay la kulmaan caqabado badan oo ay ka mid yihiin deegaanka dugsiga oo aysan isticimaali karin, ka warqab la'aanta bulshada, xushmad daro iyo ceebeyn iyo sidoo kale iyaga oo aan haysan qalab caawiya ama ay u adeegsadaan dhaqdhaqaaqa.

Tayada waxbarashadu dugsiyada dhexdooda aad ayey u hooseysaa badanaa iyada oo ay ugu wacan tahay tiro badan ee macallimiin ah oo aan lahayd tababar macalinimo oo ku filan iyo kuwa aan tababar qaadan. Qiyaastii 30%[11] macallimiinta dugsiyada aasaasiga ah ayaa leh tayadii loo baahnaa. Guud ahaan 15% keliya ayaa macalimiinta haween ah. Sababaha kale ee keenay mirodhalka liita ee waxbarashada waxaa ka mid ah fasalada oo aad u buux dhaafay, agab waxbarasho la'aan, kaabayaasha waxbarashada oo liita, heerka soo xaadiritaanka fasalada oo hooseeya iyo ka qaybgalka waalidiinta ee arimaha waxbarashada oo meesha ka maqan.

Habka waxbarashada ee Soomaaliya waxa uu ahaa mid nugul ka hor cudurka faafa ee COVID-19 taasoo ka dhalatay dhibaatooyin badan oo hore u jirey. Intaas waxaa dheer habka waxbarashada Soomaaliya waa mid kala jajaban oo u kala qaybsan dhowr addeeg bixiyeyaal kala duwan. Qiyaastii 24% ardayda dugsiga hoose iyo sare waxay dhigtaan dugsiyadda ay maamusho dowlada halka 76% a ay dhigtaan dugsiyada ay maamulaan bulshada, ururada aan dowliga ahayn (NGOs) iyo kuwa gaarka[12] loo leeyahay.

[8] Xogta waxbarashada (MoECHE EMIS January 2021)

[9] Mashruuca Kobcinta Waxbarashada Gabdhaha (CARE, 2014. Somali Girls' Education Promotion Project Baseline Study Report, p.34-35)

[10] Daraasada Caafimaadka iyo Horumarka Soomaaliya (The Somali Health and Demographic Survey, Directorate of National Statistics, Federal Government of Somalia)

[11] Qorshaha Horumarinta Qaranka (NDP) 2020-2024

[12] Buuga Xogta Waxbarashada ee sanadlaha ah (DFS MOECHE, 2019. Education Statistics Yearbook 2018/2019).

**Maamulka Waxbarashada**

Maamulka adeega waxbarashada waxaa hogaamisa Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare ee Dowladda Federaalka Soomaaliya (DFS) oo mas'uul ka ah haggida iyo maamulka guud ee waxbarashada. Heerka maamul goboleedyada (DXF), adeegga waxbarashadda waxaa maamula wasaaradaha waxbarashada. Adeega waxbarashada waxaa ka muuqda in isbedel ku dhacayo, iyada oo 2016kii ay WWH&TS ee DFS la saxeexatay WW ee DG-yada heshiis loogu magac daray Heshiiska Iskaashiga iyo Isfahamka (HII) si loo abuuro wadashaqayn dhexmarta DFS iyo Maamul Goboleedyada arimaha ku saabsan waxbarashada.

Soomaaliya waxa ay ahmiyad weyn siineysaa waxbarashada. Sida ku xusan Qorshaha Horumarinta Qaranka (QHQ) ee 8aad, Waxqabadyo dhowr ah ayaa si guul leh loo qaaday kuwaas oo ay ka mid yihiin dhameystirka Qorshaha Siyaasadda Waxbarashada (QSW); daahfurka manhaj waxbarasho oo cusub oo loogu talagalay dugsiyada hoose iyo kuwa sare ee dalka; maamulka imtixaannada qaran ee Dugsiga Sare (Fasalka 4aad) iyo Dugsiga Hoose (Fasalka 8aad) ee dalka oo dhan; iyo dhammaystirka Dib-u-eegista Wadajirka ah ee Waxbarashada (DWW).

WWH&TS waxa ay leedahay awoodda ugu saraysa iyo mas'uuliyadda dejinta siyaasadda, qorsheynta guud, dejinta heerarka waxbarasho, iyo kormeerka iyo qiimaynta sida lagu gaarayo himilooyinka qaran ee waxbarashada.

Madasha ugu weyn ee iskuxidhka waxbarashadu waa Guddiga Bahda Waxbarashada (GBW). Waa madal loogu talagalay wadaagga xogta iyo isku xidhka hay’adaha ka shaqeeya waxbarashada si looga fogaado in maaliyadda iyo waxqabadka farsamo meelo gaar ah lagu koobo.

### 1.1.3 Raadraaca iyo Falanqaynta Xaaladda Waxbarashada Aasaasiga ee Degdega ah

Waxbarashada aasaasiga ah ee degdega ah waxaa sanadkii 2004-tii Soomaaliya u soo bandhigay hay’adaha caalamiga ah ee aan dawliga ahayn (UCDA). Qorshahan waxaa lagu soo bandhigay gobolada Somaliland ka dib markii la hirgaliyay manhajka Fasalka 1-8 kaas oo ay soo saaristiisa taageerayeen UNICEF iyo UNESCO. Hay’adaha Badbaadadda Carruurta (SC) iyo Hay’ada Norway ee Qaxootiga (NRC) oo kaashanaya Wasaaradda Waxbarashada ee Somaliland waxay soo saareen barnaamij waxbarasho oo aan toos ahayn oo loo bixiyey Waxbarashada Aasaasiga ah ee aan Tooska ahayn (Alternative Basic Education) oo leh siyaasad, hagayaal iyo manhaj lagu bixin karo si ku habboon isla markaana daboolaya gundhiga waxbarashada aasaasiga ah. Qorshaha waxbarashada aasaasiga ah ee aan tooska ahayn waxaa loo hirgeliyey in ay carruurta ku nool miyiga iyo carruurta ka weyn da'da dugsiyada helaan fursad waxbarasho.
.
Barnaamijka waxaa sidoo kale ansaxiyay Dawlad Goboleedka Puntland waxaana adeegsaday Dawlad Goboleedyada kale ee xubnaha ka ah Dawladda Federaalka . Si kastaba ha ahaatee, qaabka manhajka loo fuliyey wuu kala duwanaa laakiin dhammaantood waxay isku mid ka ahaayeen dedejinta iyo in sannado kooban lagu dhamaystiro waxbarashada aasaasiga ah oo ahayd 8-da sannadood. Adeegyadan waxabarasho ee la dedejiyey waxaa bixinayey hay’ado iyo adeegayaal kale oo isticimaalayey agabkan iyagoo inta badan yareeyey waqtigii loo baahnaa.

Sannadkii 2010kii, waxbarashada aasaasiga ah ee la dedegijey waxaa wax ka baranayey 14,801 arday (51% rag ah iyo 49% dumar ah) oo ka diiwaangashan waddanka oo dhan iyada oo 51% tiradaas ka diiwaangashanayd Puntland, 38% Somaliland iyo 9% koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya. Sannadkkii 2019, waxbarashada aasaasiga ah ee la dedejiyey waxaa ka diiwaangashanaa 30,315 arday iyo 502 bareyaal taasoo tilmaamaysa in 60 arday ku soo beegmaysay 1 bare. Goobaha waxbarashada iyo bareyaashu waa yar yihiin waxaana aad u yar bareyaasha dumarka ah.

Ka dib markii WWH&TS iyo Wasaaradaha Waxbarashada ee afar Maamul Goboleed kala saxiixdeen Heshiiska Iskaashiga iyo Isfahamka (HII), waxaa la diyaariyey, lana dhaqangeliyey Qaabdhismeedka Manhajka Qaranka Soomaaliya 2017kii iyo manhaj mideysan ee Fasallada 1-8. Taasi waxa ay muujinaysaa in manhajkii loo isticmaalayey Waxbarashada Aasaasiga ee Degdega ah iyo agabkiisuba aanay la jaan qaadayn manhajka cusub ee qaranka iyo in aanu jirin qaabdhismeed siyaasadeed oo WAD ah oo ay ansaxiyey WWH&TS, manhaj ama imtixaan qaran, habka diiwaangelinta, shahaado siinta iyo jaangonyta heerka waxbarasho ee ardayda da'doodu iyo baahidoodu kala duwan tahay. Sanadihii u dambeeyey, wadatashiyo heerar kala duwan ah ayaa laga yeeshay qodobbada ay tahay in laga fiirsado marka la diyaarinayo qaabdhismeedka siyaasadeed ee Waxbarashada Dadban (WD). Talooyinka ugu muhiimsan ee ka soo baxay shirkii la qabtay Feabaraayo 2020 ee ***'wadatashiga daneeyayaasha waxbarashada dadban'*** waxay ahaayeen in la diyaariyo qaabdhismeedka siyaasadda Waxbarashada Dadban (WD), hagayaashiisa iyo qorshahii lagu fulin lahaa.

Waaxda Qorsheynta iyo Miisaaniyadda ee WWH&TS waxaa u degsanaa qorshe lagu diyaarinayo siyaasaddaha guud ahaan qeybaha waxbarashada, gaar ahaan qaabdhismeedka siyaasadda iyo manhajka waxbarashada aan tooska ahayn waxa loo mudeeyey bisha Sebtember 2020kii. Si looga fogaado in la isku khaldo barnaamijyada kale ee aan rasmiga aheyn, WWH&TS waxay ku talisay in magaca qorshahan loo beddelo Waxbarashada Aasaasiga ee Degdega ah (WAD).

Waaxda Waxbarashada Farsamada iyo Tababarada Xirfadaha iyo Waxbarashada Dadban (WFTX/WD) ee WWH&TS ayaa u xilsaaran mas'uuliyadda qorshayaasha waxbarashada aasaasiga ah ee aan tooska ahayn iyo kuwa la dedejiyey.

## 1.2 Qeexitaanka Hawlgelinta Waxbarashada Aasaasiga ee Degdega ah (WAD)

Waa qorshe waxbarasho oo waqtiga lagu fulinayo la dedejiyey, lana siiyo hadba da'da ku habboon. Ujeeddada qorshahani waa in addeegyada waxbarashada la gaadhsiiyo carruurta iyo dhallinyarada dugsiyada ka maqan kuwaas oo dhaafay da'dii isqorista dugsiyada ama sababo kale awgood aan helin fursad waxbarasho. Arintan waxaa ka mid noqon kara kuwa seegay ama waxbarashadoodii hakad gelisay sababo ay ka mid yihiin saboolnimada, faquuqida, isku dhaca iyo dhibaatooyinka. Ujeeddada qorshaha WAD waa in ardayga la siiyo aqoon u dhiganta oo loogu talagalay waxbarashada aasaasiga ah iyada oo la adeegsanayo habab wax ku ool ah oo waxbarasho oo u dhigma heerka garashada[13] ardayga.

Ku talagalka barnaamijka WAD waa carruurta aan awoodin inay iska diiwaangeliyaan waxbarashada tooska ah sababtoo ah waxay ka weyn yihiin da'da iyo shuruudaha fasalka iyo carruurta marna aan dugsi tegin iyo kuwa dhexda kaga hadhay dugsiyada. Xogta la hayo sanadkan 2020[14] ayaa muujineysa in 67% carruurta iyo dhallinyarada Soomaaliya ku nool aysan waligood dhigan waxbarashada tooska ah ama ay hadda ka maqan yihiin dugsiga sababo kala duwan awgood. Maaddaama ardayda da'doodu weyn tahay ay leeyihiin garasho qaangaar ah ayna leeyihiin xirfado, waaya-aragnimo iyo aqoon, ayna awooddaan in ay ku dhamaystiraan waxbarashada manhajka WAD muddo gaaban, taas ayaa keenaysa in manhajka, agabka iyo barbaarinta waxbarashada WAD badanaa ka duwan tahay kuwa dugsiyada tooska ah. Manhajka WAD waa mid la soo koobay oo inta badan laga saaray maaddooyinka aan muhiimka ahayn iyo kuwa soo noqnoqda iyada oo xoogga la saarayo akhriska iyo xisaabta. Qorshaha siyaasaddan WAD wuxuu leeyahay 4 heer, Heer kastaa wuxuu daboolayaa aqoon u dhiganta laba heer oo waxbarasahda tooska ah. Qorshaha WAD wuxuu xooga saarayaa dedejinta manhajka kaas oo mudo kooban ardayda siinaysa aqoon la ansixiyey oo u dhiganta waxbarashada tooska ah.

---

[13] Qeexida ay samaysay kooxda ka shaqaysa waxbarashada la-dardargeliyey (Accelerated Education Working Group definition)

[14] Xogta waxbarashada (MoECHE EMIS 2020)

Macnaha ugu weyn ee odhaahda ***'waxbarashada aasaasiga ah ee aan tooska ahayn'*** wuxuu tilmaamayaa dhammaan waxqabadyada waxbarasho ee ka baxsan habka dugsiyada tooska ah (oo ay ku jiraan waxbarashada lagu barto guriga, barnaamijyada diyaarinta ardayda, barnaamijyada gaarka ah ee carruurta hibada leh iwm). Marka la eego xaalada Soomaaliya u gaarka ah, waxbarashada aasaasiga ah ee aan tooska ahayn waa waxqabad kaabis iyo dhammaystir u ah adeegyada waxbarashada aasaasiga ah. Qorshahan waxaa loogu talagalay carruurta aan dhigan dugsiyada iyo kuwa leh baahiyo kala duwan iyada oo ujeeddadu tahay sidii loo xaqiijin lahaa in qof walba[15] uu helo adeegga waxbarashada. Waxbarsahada noocan ah waxaa la siiyaa carruurta da'doodu inta ay doonto ha noqotee si ay ugu wareegaan dugsiyadda tooska ah, waxayna ka kooban tahay hal darajo/heer waxbarasho sanadkiiba waxayna bartilmaameedkeedu yahay meelaha tulooyinka ah, xoolo dhaqatada iyo beeralayda.

## 1.3 Xaaladda Siyaasadda iyo Sharciga

Qaybtani waxay eegaysaa qaabdhismeedka sharciyada, siyaasadda iyo qoraallada kale ee caalamiga ah iyo kuwa qaranka Soomaaliyeed ee Dowladda Federaalka Soomaaliya ku khasbaya aqoonsiga xuquuqda ku aaddan waxbarasho aasaasi ah oo tayo iyo cadayn leh ee Carruurta iyo Dhallinyarada dugsiyada ka Maqan (CDhDM).

Sida ku qoran tahay Baaqa Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadanaha (1948), waxbarashadu waa xuquuq aasaasi ah. Arrintan waxaa mar kale dib loogu xaqiijiyay Axdiga Caalamiga ah ee Xuquuqda Dhaqaalaha, Bulshada iyo Dhaqanka (1966), Heshiiska Cidhibtirka Takoorka Haweenka (1979), Heshiiska Xuquuqda Carruurta (1989) iyo Heshiiska Dadka Naafada ah (2006) iyo xeerar kale oo badan oo ka mid ah agabyada caalamiga ah ee xuquuqda dadka. Waxaa sidoo kale lagu xusay sharciyada Islaamka, sharciyada qaranka iyo heshiisyada goboladda. Sannadkii 2000, dawladdaha adduunka oo ay ku jirto Soomaaliya, waxay isla qaateen lix yool oo ah waxbarashada loo dhan yahay (WDhY) iyo sideedii Yoolalka Horumarinta Kun-sannadlaha (YHK) ee markii dambe loo bedeley Yoolalka Horumarka Waara (YHW). DFS oo saxeexday Baaqa Caalamiga ah ee Badqabka Dugsiyada waxay sidoo kale aqoonsan taha in weerarada ka dhanka ah waxbarashadu ay abuuraan caqabado waaweyn oo carruurta ka soo gaadha, ilaalinta amaankooda, iyo inay si wax ku ool ah wax u bartaan.

**Qorshaha Horumarinta Qaranka 9 (2020-2024**) wuxuu aqoonsan yahay in waxbarashadu ay muhiim u tahay horumarka qaranka, yareynta saboolnimada iyo in ay muhiim u tahay in dhammaan dadka Soomaaliyeed gaadhaan intii karaankooda ah. Soomaaliya waxay xaqiijin doontaa in yoolka 4aad ee Yoolalka Hhorumarinta Waarta (YHW 4) la gaaro iyada oo loo marayo waxbarasho iyo tababaro tayo leh oo loo wada dhan yahay loona siman yahay taas oo kor u qaadaysa fursadaha dadka oo dhan noloshooda. Tiirka 4aad: Horumarinta Bulshada, qorshaha Horumarinta Awoodda Dadka waxay tilmaamaysaa toddobada mudnaanood ee lagu horumarinayo waxbarashada iyo tababarka. Mudnaanta 2aad waxay la xiriirtaa xoojinta siyaasadeed iyo qaabdhismeedkeeda sharciyada si kor loogu qaado bixinta adeegyada waxbarashada. Mudnaanta 4aad waxay diiradda saareysaa dadaallada waxbarasho ee loogu talagalay dadka ugu nugul: Barakacayaasha, gabdhaha, carruurta miyiga iyo dhallinyarada leh fursadaha ugu yar ee gelitaanka dugsiyada. Qorshaha Horumarinta Qaranka (QHQ) wuxuucaqabadahaas ku waajihi doonaa iskaashi lala yeesho daneeyayaasha aan dowliga ahayn, dhismeyaal cusub, haweenka macalimiinta iyo wacyigelinta qoysaska ee muhiimada waxbarashada, taas oo ay kaabayso badbaadada iyo amaanka gobolka oo kor loo qaaday.

[15] Qorshe-Siyaasadeedka Wabarashada (ESSP 2018-2020)

**Sharciga Waxbarashada Soomaaliyeed (2017)** waxaa lagu qeexay Qodobka (3) in cannug walba oo Soomaaliyeed xaq u leeyahay inuu helo waxbarasho aasaasi ah oo lacag la'aan ah. Sharcigan wuxuu siinayaa sinaan waxbarasho tayo leh dhammaan carruurta Soomaaliyeed.

Sida lagu sheegay Siyaasadda Waxbarashada Qaranka (SWQ) 2017 Qaybta 3.4: Mabaadii'da H\Hagaysa waxay xusayaan 'Helitaanka Waxbarshada': Muwaadin kasta oo Soomaaliyeed wuxuu xaq u leeyahay waxbarasho ku habboon da'diisa iyo baahidiisa, oo ay ka mid tahay bixinta waxbarashada aasaasiga ah ee bilaashka iyo khasabka ah. Qaybta 12 ee Siyaasadda Waxbarashada Qaranka (SWQ) waxay qeexaysaa qodobbada ku saabsan sidii loo fududayn lahaa waxbarashada aasaasiga ah ee la dedejiyey iyo helitaanka fursadaha waxbarasho ee ku habboon ardayda doonaya inay sii wataan waxbarashada. Mid ka mid ah ujeedooyinka ugu muhiimsan waa in la iswaafajiyo waxbarashada aasaasiga ah ee la dedejiyey iyo manhajka waxbarashada aasaasiga tooska ah, taasoo fududeynayn doonta ku soo wareegida dugsiga hoose ee tooska ah heerarka iyo fasalka da' kasta ku habboon.

**Qorshaha Waxbrashada (QSW) (2018-2020)** Cutubka 7aad wuxuu tilmaamayaa qorsheyaasha adeegga waxbarashada aan tooska ahayn ee la jaan qaadaya waxbarashada aasaasiga ah ee carruurta dugsiyada ka maqan (CDhDM) iyo kuwa leh baahiyo kala duwan si loo hubiyo in waxbarashada ay wada heli karaan. Qorshaha waxbarashadu wuxuu dhigayaa aasaas adag oo lagu horumarinayo tayada waxbarashada aasaasiga ah ee la dedejiyey. Qoraallada muhiimka ah ee hagaya qabyo-qoraalka siyaasadda WAD waxaa ka mid ah:

- Qorshaha Horumarinta Qaranka ee Soomaaliya 2020-2024
- Sharciga Waxbarashada Qaranka 2017
- Siyaasadda Waxbarashada Qaranka 2017
- Qorshaha Istaraatiijiyadda Waxbarashada 2018-2020
- Qaabdhismeedka Manhajka Qaranka 2017
- Siyaasadda Dugsiyada Gaarka loo leeyahay
- Qaabdhismeedka Siyaasadda Qabyada ah ee Xarumaha Waxbarashada Bulshada
- Siyaasadda Qaranka ee Baahiyaha Waxbarashada Gaarka ah Naafonimada iyo waxbarashada loo dhan yahay (SEND & IE) 2018
- Qabyo Qoraalka Siyaasadda Macallinka (2020)
- Qorshaha Waxbarashada ee Ka-Jawaabista COVID-19 (2020)
- Tilmaamaha dib-u-furidda Dugsiga (2020)
- Hagaha Kormeerka Dugsiyada ee Hubinta Tayada
- Dawladd Goboleedka Puntland ee Soomaaliya, Istaraatijiyadda WWTS ee hirgelinta waxbarashada aasaasiga ah ee beddelka ah ee carruurta aan dugsiyada dhigan, 2007
- Dawladd Goboleedka Puntland ee Soomaaliya Tilmaamaha Hirgalinta Barnaamijka 2008 ee Waxabarashada Aasaasiga ee Degdega ah.
- Jamhuuriyadda Nidaamka Somaliland, WW, Tilmaamaha Hirgelinta Waxbarashada Aasaasiga ah ee aan Tooska ahayn 2008

WWH&TS waxa ay leedahay awoodda ugu saraysa iyo mas'uuliyadda dejinta siyaasadda, qorsheynta guud iyo dejinta heerarka waxbarasho ee kormeerka iyo qiimaynta sida lagu gaarayo himilooyinka qaran. Waaxda WD ee wasaaradda waxaa ka go'an in ay kordhiso helitaanka adeega waxbarashada ee dhallinyarada iyo da'yarta dugsiyada ka maqan, xoojinta tayada waxbarashada aasaasiga ah ee aan tooska ahayn iyo mida la dedejiyey iyo sidoo kale hagaajinta hawl-fulinta iyo maaraynta waaxda.

### 1.4 Sababta Siyaasadda WAD loo Sameeyey

1. Sida ku cad Siyaasadda Waxbarashada Qaranka (SWQ), DFS waxa ay dejisay ujeeddooyin dhowr ah, oo ay ka mid tahay baahida loo qabo in WWH&TS loo dhiso qayb awood leh oo qaabilsan Waxbarashada Aasaasiga ee Degdega ah si loo xaqiijiyo nidaaminta iyo iskudubaridka barnaamijyada kala duwan ee WAD. Qorshaha Waxbarashadda Qaranka (QSW) 2018-2020 waxa uu qeexayaa qorsheyaasha iyo mudnaanaha siyaasadeed ee muhiimka ay tahay in la fuliyo inta lagu jiro mudadda Qorshaha Siyaasadda Waxbarashadda (QSW) ee Waxbarashada Dadban (WD) iyo barnaamijyada waxbarashada aasaasiga ah ee aan tooska ahayn. Intii loo fadhiyey wadatashigii daneeyayaasha waxbarashada dadban ee Feebaraayo 2020, waxaa la diyaariyey habraac loogu talagalay horumarinta siyaasadda WD. WWH&TS waxa ay go'aan ku qaadatay in la diyaariyo siyaasad u gaar ah waxbarashada aasaasiga ee degdega ah taas oo xiriir la leh siyaasadda Waxbarashada Dadban (WD).

2. Siyaasadda Waxbarashada Dadban (WD) waxay soo bandhigaysaa qaabdhismeed guud oo mideysan oo loogu talogalay waxbarashada aasaasiga ee degdega ah ee Soomaaliya. Qoraalkani wuxuu hagayaa in ardayda loo abuuro dariiqyo habboon oo loogu wareegi karo waxbarashada tooska ah ama loogu mid noqon karo xooga shaqaalaha.

3. Siyaasadda Waxbarashada Aasaasiga ee Degdedga ah (WAD) waxay hagaysaa oo xoojinaysaa bixinta adeega Waxbarashada Aasaasiga ee Degdeg ah. Tani waxay carruurta iyo dhalinyaradda dugsiyada aan tegin ee da’doodu weyn tahay (CDhDM) siin doontaa fursado waxbarashada aasaasiga ah oo ay ku jiraan akhris-qorista iyo xisaabta, iyo xirfadaha nolosha.

4. Siyaasadda WAD waxay keenaysaa qorshe qaran oo ah dhinacyada qorshaynta, dhaqangelinta, kormeerka, iyo qiimaynta dhammaan adeegyada Waxbarashada Aasaasiga ee Degdega ah (WAD). Sidoo kale siyaasaddani waxay hagaajin doontaa iswaafajinta waxbarashada aasaasiga ah ee la dedejiyey iyo guud ahaan qorshaynta, dhaqangelinta, kormeerka, iyo qiimaynta nidaamka guud ee waxbarashada Soomaaliya.

### 1.5 Baaxadda Qaabdhismeedka Siyaasadda

Qaabdhismeedka siyaasadda Waxbarashada Aasaasiga ee Degdedga ah (WAD) waxa uu ku saabsan yahay dhammaan howlaha waxbarashada, tababarka iyo cilmi baarista, iyo barnaamijyada Waxbarashada Aasaasiga ee Degdedga ah (WAD) ee Soomaaliya. Siyaasaddan waxaa lagu fulinayaa (laakiin kuma xaddidna) daneeyayaasha muhiimka ah ee soo socda:

1. Bixiyeyaasha adeegga Waxbarashada Aasaasiga ee Degdedga ah (WAD) siiya ardayda, kuwa dawladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay labadaba.
2. Maalgeliyeyaasha dawladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay oo ay ku jiraan deeq-bixiyeyaasha iyo qurbajoogta.
3. Bulshooyinka iyo guddiyada waxbarashada bulshada (GWB).
4. Hay’adaha horumarintaa, ururada bulshada, ururada aan dawliga ahayn (UDA), ururada bulshada rayidka ah, hay’adaha qaramada midoobey iyo deeq bixiyeyaasha.
5. Maamuleyaasha ama bareyaasha Waxbarashada Aasaasiga ee Degdedga ah (WAD), bareyaasha iyo ardayda.
6. Hay'adaha waxbarashada, oo ay ku jiraan dugsiyada hoose/dhexe (kuwa dawladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay), hay'adaha tababarka xirfadaha iyo hay’adaha bixiya tababarada bareyaasha iyo tababarada bulshada.
7. Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare, Wasaaradaha Waxbarashada ee Dawlad Goboleedyada iyo wasaaradaha/waaxyaha kale ee dawladda.
8. Bixiyeyaasha kale ee waxbarashada.

# 2. CUTUBKA 2AAD: QAABDHISMEEDKA SIYAASADDA

## 2.1 Mabaadii'da Hagasya Siyaasadda

Mabaadi'da soo socota ayaa hagaysay diyaarinta Qaabdhismeedka Siyaasadda Waxbarashada Aasaasiga ee Degdedga ah (WAD) waxayna waafaqsan yihiin shareecada Islaamka, sharciyada qaranka, heshiisyada caalamiga ah iyo kuwa gobolka iyo siyaasaddaha iyo xeerarka kale. Mabaadii'dan oo midba kan kale saamayn ku leeyahay ayaa hagaya dhaqangelinta Qaabdhismeedka Siyaasadda Waxbarashada Aasaasiga ee Degdedga ah (WAD):

1. **Ka qeybgalka iyo lahaanshaha bulshada:** Bulshada, waalidiinta iyo ardayda waxbarta waa in lala tashado oo ay si firfircoon uga qeyb galaan dhammaan dhinacyada Waxbarashada Aasaasiga ee Degdedga ah (WAD) sida xulashada xarunta WAD, waqtiyada fasallada, qorshaynta, hirgalinta, kormeerka iyo qiimaynta barnaamijka WAD. Marka bulshadu door toosa ah ka qaadato barnaamijka WAD waxay keenaysaa lahaanshaha iyo isla-xisaabtanka bulshada ee WAD waxayna horseedi doontaa guul iyo waaritaan.

2. **Habboonaanta iyo gaarsiinta adeegga WAD:** Qorshaha Waxbarashada Aasaasiga ee Degdedga ah (WAD) waa inuu sida ku habboon uga jawaabo baahiyaha kala duwan ee ardayda iyo waalidiinta ay saameeyeen qaab nololeedkooda iyo caqabadaha waqtiyada kala duwan ee xaaladaha deegaankooda. Waqtiyada fasalka iyo xarunta WAD waa in laga dhigo mid ku habboon baahida bulshada, baraha, iyo baahiyaha gaarka ah ee ardayda labka iyo dheddigga ah oo leh muhuumada ugu weyn si loo hubiyo xaadiritaanka joogtada ah iyo dhammaystirka heerarka.

3. **Helitaanka waxbarashada:** Muwaadin kasta oo Soomaaliyeed waxa uu xaq u leeyahay waxbarasho ku habboon da'diisa iyo baahidiisa, oo ay ka mid tahay addeeg waxbarasho aasaasi ah oo bilaash ah iyo mid khasab ah. Waxaa diiradda la saarayaa sare u qaaddida fursadaha waxbarasho iyada oo la yareynyo fogaanta u dhexaysa guriga iyo xarunta WAD, yaraynta eexda jinsiga, kor u qaadista tayada waxbarashada, iyo dejinta jadwalka casharada si ku habboon ardayda.

4. **Waxbarashada loo dhan yahay:** Dhammaan qorsheyaasha lagu fulin doono siyaasaddan waa inay si toos ah u dhiirrigeliyaan una xaqiijiyaan ka qaybgalka carruurta naafada ah barmaamijyada Waxbarashada Aasaasiga ee Degdedga ah (WAD).

5. **U sinnaanta fursadaha ee labka iyo dhediga:** Qorshaha Waxbarashada Aasaasiga ee Degdedga ah (WAD) wuxuu aqoonsan yahay baahiyaha kala duwan ee gabdhaha iyo wiilasha. Dhammaan waxqabadyada lagu hirgelin doono siyaasaddan waa in ay yareeyaan takoorka jinsiga ku salaysan, ayna dhiirigeliyaan sinnaanta jinsiga si aan waxyeelo u soo gaarin carruurta. Si kor loogu qaado sinaanta jinsiga, waxaa diiradda la saarayaa in la kordhiyo haweenka xubnaha ka ah guddiyada waxbarashada bulshada iyo haweenka bareyaasha ah. Barnaamijyada ayaa loo qaabayn doonaa loona hirgelin doonaa si loo wanaajiyo wacyiga la xiriira sinnaanta jinsiga ee bulshada dhexdeeda. Feejignaan gaar ah ayaa la siin doonaa hubinta ka qaybgalka dumarka dhammaan barnaamijyada 'WAD' iyaga oo ah arday ama bareyaal iyo ka hortaga dhaqamada xun ee sinnaanta jinsiga hoos u dhigaya.

6. **Sinnaanta:** Mabda'a sinnaanta waxaa loola jeedaa xaqiijinta waxbarasho loo dhan yahay. Addeegyada waxbarashada waa in si siman loo siiyaa dhammaan shaqsiyaadka bulshada iyada oo aan loo eegin xaaladda naafada, lab ama dheddig, da'da, midabka, deegaanka, dhaqan, qabiilka, iyo dabaqadda bulshada. Waa in diiradda la saaro in loo dhan yahay waxbarashada, takoor la'aan, isla-xisaabtanka bulshada, iyo sinnaanta ragga iyo dumarka dhinaca waxbarashada.

7. **Iskuxidhka iyo u gudubka dugsiyada tooska ah:** Waxbarashada Aasaasiga ee Degdedga ah (WAD) waa qayb ka mid ah dadaalka lagu doonayo in dhammaan carruurta da'da dugsiga gaadhay ay helaan waxbarasho aasaasi ah oo tayo iyo sharciyad leh. Barnaamijyada WAD waxay ay leeihiin meelo iyo waqtiyo cayiman oo laga soo galo iyo kuwa laga baxo, si ay ugu suurtowdo ardayda da'doodu weyn tahay in ay ku soo biiraan heerka tacliineed ee ku habboon iyaga oo waxbarashadooda ku sii wadan kara xawaare la dedejiyey. Ardayda WAD waxay u wareegi karaan waxbarashada tooska ah fasalka iyo da'da saxda ah ee ku habboon heerka ay markaas marayaan oo ku kooban ilaa fasalka 8aad..

8. **Adeeg qiimihiisu maangal yahay:** Barnaamijka Waxbarashada Aasaasiga ee Degdedga ah (WAD) waxa uu addeegsan doonaa agabyada maxalliga ah ee hada jira sida dugsiyada tooska ah iyo agabka deegaanka laga heli karo. Waxaa la xaqiijin doonaa in bareyaasha laga qoro bulshada dhexdeeda isla markaana khibradaha deegaanka loo adeegsado xallinta dhibaatooyinka ka hor yimaada barnaamijka WAD.

9. **Waxbarasho tayo leh:** Bixinta barnaamijka Waxbarashada Aasaasiga ee Degdedga ah (WAD) waa inuu ahaadaa mid tayo sare leh si loo hubiyo in tiro badan oo arday ah ay dhameystiraan waxbarashada noocan ah. Waa in la siiyaa agab waxbarasho oo ku filan si loo abuuro jawi ku habboon waxbarashada. Shaqaalaha WAD, xubnaha guddiga waxbarashada bulshada (GWB) iyo baruhu waa inay helaan wacyigelin u saabsan WAD iyo xirfadahooda oo kor loogu qaadayo koorsooyinka ay bixiyaan ama ay ansixisay WWH&TS si loo wanaajiyo aqoontooda iyo waxbarashadooda. Waa in kormeerka iyo qiimaynta waxbarshada laga laga wada qaybgalo, iyo adeegyada taakulaynta si kor loogu qaado ku habboonaanta iyo tayada barnaamijka.

10. **Ku-Habboonaanta**: Dhammaan waxbarashadu waa inay noqoto mid ku habboon da'da, baahiyaha dhaqan-dhaqaale ee Soomaaliya iyo muwaadiniinteeda. Nuxurka barnaamijka Waxbarashada Aasaasiga ee Degdedga ah (WAD) waa inuu waafaqsan yahay qaabdhismeedka manhajka qaranka si loo hubiyo in ardaydu ay si guul leh ugu gudbi karaan waxbarashada tooska ah ayna helaan aqoonsi waxbarasho.

11. **Ka jawaab celinta dhaqanka islaamnimada:** Barnaamijka Waxbarashada Aasaasiga ee Degdedga ah (WAD), hababka iyo sida loo fulinayo waa inuu ka tarjumaa diinta islaamka iyo xaqiiqooyinka dhaqanka wanaagsan isla markaana uu dhiirrigeliyaa midnimada, hanka iyo ixtiraamka hiddaha dhaqameed ee Soomaaliya.

12. **Deegaanka waxbarashada:** Dhammaan ardayda WAD waa inay helaan deegaan iyo goob waxbarasho oo lagu badbaadayo,

13. **Wadashaqayn:** Wasaaradda waxbarashaddu waxay mas'uul ka noqoon doontaa, isla markaana lagula xisaabtami doonaa hirgelinta siyaasaddan. Laakiin waxay mar walba raadin doontaa inay horumariso iskaashiyo wax ku ool ah oo heer qaran, heer gobol iyo heer caalami ah si kor loogu qaado loona xaqiijiyo guusha geeddi-socodka dhaqangelinta siyaasaddan.

14. **Waaritaanka:** Waxqabadyada WAD waa in ay la jaanqaadaan siyaasadda oo ay dhamaystiraan heerarka waxbarashada WAD. Bulshooyinka waxaa lagu dhiirrigelinayaa inay abaabulaan khayraadka ay haystaan xaga maaliyadda iyo xag kaleba si barnaamijka WAD u noqdo wid waaritaan leh.

## 2.2 Ujeeddada Guud

Ujeeddada Qaabdhismeedka Siyaasadda Waxbarashada Aasaasiga ee Degdedga ah (WAD) waa hubinta in adeega la gaadhsiiyo carruurta iyo dhallinyarada dugsiyada ka maqan ee ka weyn da'da dugsiyada iyada oo la raacayo hab isku xidhan oo ku habboon. Siyaasaddani waxay hagaysaa dhammaan bixiyeyaasha WAD ee Soomaaliya, oo ay ku jiraan WWH&TS iyo WW ee DG-yada, si loo xaqiijiyo bixinta addeega iyo tayada, wada-hawlgalayaashu waxay u hoggaansami doonaan qaabka iyo heerarka waxbarashada ee ay dhigayso siyaadadda WAD. Siyaasaddani waxay kaloo dhigaysaa qaabka lagu kormeerayo laguna hagaajinayo barnaamijyada WAD.

## 2.3 Himilada

WAD waxaa loogu talagalay in ay gacan ka geysato himilada WWH&TS ee ah in la gaaro yoolalka waxbarashada ee SDG 4 iyada oo la kordhinayo helitaanka waxbarasho tayo leh ee carruurta iyo dhallinyarada ka maqan dugsiyada.

## 2.4 Yoolka

In carruurta iyo dhallinyarada dugsiyada ka maqan la siiyo waxbarasho aasaasi ah oo tayo leh, waqtigeedana la dedejiyey taasoo ku habboon da'dooda, waxbarashadaas oo wadata cadayn ay ugu gudbi karaan waxbarashada tooska ah, barashada xirfaddaha iyo fursadaha nolosha.

## 2. 5 Ujeeddooyinka

Caddeymaha la hayo ayaa muujinaya in ka badan kala bar dhammaan carruurta iyo dhallinyarada ku nool Soomaaliya ay hadda ka maqan yihiin dugsiga sababo kala duwan awgood. Siyaasadda WAD ujeedaddeedu waa in wax laga qabato arrintan oo la wanaajiyo fursadda waxbarashada kuwa aan waligood ka faa'iideysan waxbarashada tooska ah ama kuwa ka baxay dugsiyada.

1. Si loo hubiyo in hirgelinta xeeladdaha si nidaamsan loo qorsheeyay, loona abaabulay si loo siiyo fursado isku mid ah oo Waxbarashada Aasaasiga ee Degdedga ah (WAD)ah carruurta iyo dhallinyarada dugsiyada ka maqan.
2. Kordhinta helitaanka waxbarashada ee bulshada ama kooxaha danyarta ah sida xoolo dhaqatada, gabdhaha, carruurta naafada ah, carruurta iyo dhallinyarada dugsiyada ka maqan, iyada oo la balaarinayo bixinta barnaamijka WAD.
3. In la siiyo fursad labaad kuwa joojiyey waxbarashadoodii ama kaga baxay fasalada heerar kala duwan ee aasaasiga ah.
4. Kor u qaaddida sinnaanta jinsiga iyo kordhinta diiwaangelinta gabdhaha.
5. Xaqiijinta in la aqbalo guulaha ardayda iyo shahaado siinta barnaamijyada WAD si ay ugu suurta gasho u gudubka nidaamka waxbarashada aasaasiga ee tooska ah, dugsiga sare ama xarumaha tababarka xirfadaha.
6. In kor loo qaado tayada manaahijta WAD, agabka waxbarista iyo mirodhalka barashada kuwaas oo la jaanqaadaya manhajka waxbarashada tooska ah.
7. In la xoojiyo awoodda shaqaalaha WAD iyo bareyaasha si ay u bixiyaan waxbarasho tayo leh oo ku habboon.
8. Hagaajinta hababka isuduwidda hawlaha WAD, waaxyaha WWH&TS iyo hay'adaha horumarinta ee dhammaan heerarka kala duwan si loo xoojiyo maamulka hawlaha WAD.
9. Dhaqangelinta u qareemid ballaaran si kor loogu qaado wacyiga ku saabsan barnaamijyada WAD.
10. In la xaqiijiyo in baraha WAD la siiyo mushahaar ku habboon.
11. Abuurida iyo abaabulka khayraad lagu taageerayo barmaamijyada WAD oo saldhig u ah waxbarasho mudo dheer ah.

# 3. CUTUBKA 3AAD: QODOBBADA SIYAASADDA

### 3.1 Diiwaangelinta iyo Ansixinta Barnaamijyada WAD

1. WWH&TS waxa ay dejin doontaa heerarka tayada, habraacyada lagu nidaaminayo WAD habka kaydinta xogta iyo diiwaannada ee heer qaran ee barnaamijyada WAD, ogolaanshaha iyo haggida hay'adaha caalamiga ah ee doonaya inay taageeraan barmaamijyada WAD.

2. WWH&TS waxa ay awood buuxda u leeyihiin inay kala noqoton ogolaanshaha hay'adaha caalamiga ah ee taageera barmaamijyada WAD oo ku guuldaraysata in ay ilaaliyaan heerarka tayada WAD ama ku dhaqmaan siyaasadda, manhajka, hababka iyo qorsheyaasha loo dejiyey barmaamijyada WAD.

3. WW ee DG-yada waxa ay masuul ka yihin diiwaangelinta, aqoonsi siinta, bixinta ogolaanshaha (ruqsad) iyo caddeynta dhammaan barnaamijyada Waxbarashada Aasaasiga ee Degdedga ah (WAD), xarumaha WAD, bareyaasha, madaxa bareyaasha, maamulayaasha xarunta WAD, iyo shaqaalaha adeegga hoose qabta, kaydinta xogta barmaamijyada, xarumaha, shaqaalaha iyo ardayda WAD. Xogtaas waxay si joogto ah ula wadaagayaan WWH&TS.

4. Dhammaan hay'adaha, kuwa dawliga ah iyo kuwa aan dawliga ahaynba, ee danaynaya inay aasaasaan ama hawl geliyaan barnaamijyo WAD ah waa in ay iska diiwaangeliyaan oo ay oggolaansho ka helaan WW ee DG-yada. Ogolaanshuhu wuxuu ka koobnaan doonaa diiwaangelin hore iyo aqoonsi dambe ama shahaado la siiyo bixiyeyaasha WAD. Hay'adaha ama cidii danaynaysa waxay WW keeni doonaan xogta diiwaangelinta si loogu qoro diiwaanka dhexe ee bixiyeyaasha adeega WAD. Hay'adaha aan diiwaangashanayn ee horay u bilaabay howlaha WAD waxaa looga baahan yahay inay ku soo gudbiyaan qoraallada diiwaangelinta hal bil gudahood laga soo bilaabo ogeysiiska siyaasaddan. WW ee DG-yada waxa ay xogta bixiyeyaasha WAD u gudbinayaan WWH&TS.

   Haddii bixiyaha WAD uu ku guuldareysto inuu buuxiyo shuruudaha diiwaangelinta, waxaa loo oggolaan doonaa seddex bilood inuu soo buuxiyo shuruudaha ka hor istaagaya in la aqoonsado. Intaa ka dib, haddii ay ku guuldareystaan inay buuxiyaan shuruudaha, waxaa la fari doonaa in ay joojiyaan howlaha. Ogeysiis ayaa la sameyn doonaa lagu sheeyago in adeeg bixiyahaasi uusan haysan diiwaangelin iyo aqoonsi.

**Talaabooyinka Siyaasadda (sida ku xusan Siyaasadda Dugsiyada Gaarka loo leeyahay)**

Si wax looga qabto siyaasaddan, Dowladdu waxay addeegsan doontaa xeeladaha soo socda:

1. In la xaqiijiyo in maamulka dugsiga uu buuxiyo waraaqaha codsiyada looga baahan yahay oo dhan.
1. In la hubiyo in dhammaan qoraallada loo baahan yahay la soo gudbiyey, la oggolaaday oo si habboon loo kaydiyey.
2. Hubinta in qoraallada la soo gudbiyey (iyo kuwa la xaqiijiyey) ay ka mid yihiin:
   a) Magaca dugsiga iyo goobta,
   b) Magacyada milkiilayaasha,
   c) Xogta xiriirka,
   d) Magacyada hawlwadeenada dugsiga, haddii ay ka duwan yihiin dadka ku xusan faqradda-b,
   e) Cadaymaha aqoonta shaqaalaha waxbarista,
   f) Barnaamijyada waxbarasho ee xarunta haddii ay ka duwan yihiin manhajka waxbarasho ee qaranka,

g) Liistada maaddooyinka la soo jeediyey in la bixiyo iyo tilmaamaha xirfadaha waa weyn iyo dhinacyada aqoonta ee ay baran doonaan ardaydu, kuwaas oo ay tahay inay waafaqsanaadaan shuruudaha tilmaamaha wasaaradda,
h) Caddeyn in dhismaha uu dugsigu adeegsan doono uu buuxin doono xeerarka kala xadaynta ee dawladda hoose iyo heerarka aasaasiga ah ee wasaaradda.

3. In la xaqiijiyo in dugsigu buuxiyo dhammaan heerarka aasaasiga ah ka hor inta sanad dugsiyeedku uusan bilaaban.
4. Hubinta in maamulka dugsigu bixiyo khidmadaha diiwaangelinta iyo ogolaanshaha.
5. Hubinta in dugsiga la siiyay ogolaansho ku meelgaar ah ka hor inta uusan bilaaban sanad dugsiyeedka.
6. Hubinta in dugsiga cusubi saddex bilood ee ugu horaysa shaqadiisa helo shatiga ku meel gaadhka ah oo 2 sano ah.
7. In lagu sameeyo qiimayn dibadeed dhamaadka sanadka 2aad si loo siiyo ogolaansho shan sano ah.
8. Hubinta in maamulka dugsiga aysan badalin goobta loo ogolaaday dugsiga in laga furo, sidoo kale aysan isbedel weyn ku sameynin dhismaha iyada oon wasaarada laga helin ogolaansho.

5. WW ee DG-yada waxa ay bixiyeyaasha WAD siinayaan diiwaangelin ku meel gaarka ah (muddo 2 sano ah) ka hor inta aan la ansixin diiwaangelin buuxda iyada oo la raacayo fulinta shuruudaha diiwaangelinta, waxa ayna awood buuxda u leeyihiin inay kala noqdaan ogolaanshaha iyo shahaadada diiwaangelinta bixiyeyaasha WAD ee ku guuldaraysata ilaalinta heerarka tayada WAD.

## 3.2 Wacyigelinta, Abaabulka iyo ka Qeybgalka Bulshada

### 3.2.1 Ka Qeybgalka Bulshada iyo Isla Xisaabtanka

1. Si bulshadu u fahamto muhiimada Waxbarashada Aasaasiga ee Degdedga ah (WAD), waa in la sameeyo wacyigelin bulsho oo ku aadan sababaha iyo ujeedooyinka WAD, habka xulashada iyo ku sugnaanta ardayda iyo sida ardaydu ugu gudbi karaan dugsiyada tooska ah.

2. Si loo hubiyo daah furnaanta iyo lahaanshaha, bulshada ka qeybgali qorshaynta, kormeerka, dhaqangelinta iyo hagaajinta joogtada ah ee xarumaha WAD ee ku yaala xaafadooda.

3. Waa in la hirgeliyo lana adkeeyo qaabdhismeedka maamul ee la isla xisaabtami karo sida Guddiyada Waxbarshada Bulshada (GWB) ee xarumaha cusub iyo kuwa hore u jirey. Xarumaha WAD ee aan ku dhex shaqayn dugsi toos ah oo hadda jira, waa in loo sameeyaa Guddiga Waxbarashada Bulshada (GWB). Marka xarumaha WAD ay ku dhex yaalliin dugsiyada tooska ah ee hore u jirey, qaabdhismeedka guddiga ee jira waa inuu noqdaa mid ay ku jiraan xubno metela bulshada WAD loogu talogalay.

4. Gudiga Wwaxbarashada Bulshada (GWB) oo ay yeelanayaa xarumaha WAD eek a baxsan dugsiga tooska ah, waxa ay ka koobnaan doonaan ugu badnaan 7 qof oo ka kooban Guddoomiye, xoghaye, khasnaji iyo 4 xubnood oo kale. Waa inay ku jiraan:
   a. Madaxa baraha xarunta WAD,
   b. Baraha WAD
   c. Wakiilka waalidiinta
   d. Wakiilka ardayda
   e. Wakiilka ganacsatada
   f. Wakiilka haweenka (Haweeney ayaa laga soo xulan karaa ururka haweenka/waalidiinta)
   g. Hogaamiyaasha diinta, waxgaradka, ama dadka waxtarka leh ee ay ogol yihiin bulshadu

5. Guddiga waxbarashada ee dugsiga tooska ah (GWB) waxay yeelan karaan ilaa 11 xubnood si loo hubiyo in WAD ay matalayaan waana inay ka mid yihiin ugu yaraan 2 haween ah iyo 1 xubin oo matalaya ardayda WAD.

6. Hubinta in Guddiga Waxbarashada Bulshada (GWB) ay metelayso bulshada, loona tabab aray ama loo diyaariyey in ay taageeraan maaraynta WAD.

7. Guddigu waxa ay ilaalin doonaan xeerarka soo socda ee lagu qeexay qabyo-qoraalka siyaasadda Guddiga Waxbarashada Bulshada (GWB) ee 2020 oo sheegaysa:

> Shuruudaha ugu waaweyn ee [xubinimada guddiga waxbarashada (GWB)] ayaa ah in dadku ay ku tabaruci doonaan waqtigooda oo aysan jirin wax lacag bixin ah inta lagu guda jiro shaqada guddiga, xubin ka ahaanshaha (GWB) waa 2 sano;
>
> Xubnaha guddiga oo ay ku jiraan saraakiil, Guddoomiyaha, Xoghayaha, Khasnaji iyo afar xubnood oo kale taasoo tirada guud ee guddiga ka dhigeysa 7 xubnood.
>
> Guddiga waxbarashadu (GWB) waxay sida caadiga ah kulmi doontaa labadii toddobaadba mar sedex saac. Kulamo dheeri ah ayaa loo ballami karaa marka loo baahdo;
>
> – Dhammaan qodobada kulanka looga hadlayo iyo qoraallada waxaa loo gudbin doonaa xubnaha 5 maalmood ka hor kulanka. Arimaha degdega ah waa laga fiirsan karaa hadhow haddii Xoghayaha (GWB) uu bixiyo ogolaansho;
>
> – Nuxurka shirarka waa la qorayaa waxaana lagu wadaagi doonaa hadal iyo qoraal;
>
> – Shan xubnood oo Guddiga ka mid ah marka ay joogaan ayaa sida caadiga ah kulanka guddigu qabsoomi karaa;

### 3.2.2 Masuuliyadda Guddiga Waxbarashada (GWB)

a) In ay si firfircoon uga qayb qaataan maaraynta xarunta WAD
b) Ka qaybgal tababarka guddiga (GWB)
c) Kor u qaadista wacyiga iyo abaabulka xubnaha bulshada si ay u qoraan carruurta una dhiiri galiyaan is qorista gabdhaha
d) Ka qayb qaadashada soo xulashada ardayda WAD
e) In ay ardayda iyo baraha isla ogolaadaan jadwalka iyo waqtiyada fasalka WAD
f) Jaangoynta goobta laga hirgelinayo xarunta WAD iyo abaabulka bulshada iyo kheyraadkeeda deegaanka si loo dhiso xarunta, dayactirkeeda iyo socodsiinta barnaamijka iyaga oo la tashanaya GWD
g) Ka qayb qaadashada aqoonsiga, xulashada, shaqaalaynta iyo cayrinta baraha WAD
h) Abuurida dakhli xarunta WAD si ay ugu darsato mushaaraadka baraha (lacag ama agab kale)
i) Dhiirrigelinta isdiiwaangelinta, sii wadashada iyo dhammaystirka WAD iyada oo si gaar ah diiradda loo saarayo gabdhaha
j) La socoshada xaadiritaanka bareyaasha iyo ardayda iyo waxqabadkooda. Iyo taageerida waxardayda si aysan uga tegin waxbarashada
k) La socoshada maqnaanshaha baraha iyo ardayda iyo dabagalka kuwa ka hadha waxbarashada
l) Ka qeyb qaadashada go'aan gaarista (aqoonsiga iyo kala hormarinta baahiyaha, qorshaynta WAD, dhaqangelinta, kormeerka iyo qiimaynta)
m) Dejinta iyo hirgelinta qorshaha horumarinta xarunta WAD
n) La socodsiinta bulshada howlaha WAD
o) Si firfircoon uga qayb qaadashada abaabulka bulshada ee ku aadan waaritaanka WAD

### 3.3 Hirgelinta Xarrunta WAD

1. Xarumaha WAD waa in ay lahaadaan deegaan waxbarasho oo nabdoon, nadiif ah, lagu badbaadayo, kuna habboon waxbarashada isla markaana waafaqsan halbeegyada ugu yar ee ay dejisay WWH&TS.

2. Dhammaan xarumaha WAD waa inay diiwaangashan yihiin oo ay helaan oggolaansho 2 sano ah si ay u bilaabaan barnaamijka ama ay u hawlgalaan sida xarun WAD ah. Dhammaan xarumaha WAD waa in lagu sameeyo booqashooyin lagu hubinayo tayodooda ugu yaraan 2 jeer sanad dugsiyeedkiiba.

3. Bulshada waa inay ka qeybgashaa marka Goobaha xarumaha WAD la dooranayo. Mudnaanta waa in la siiyaa bulshooyinka aan dugsiyada lahayn (ay adag tahay in la gaaro), meelaha ay dadka ku badan yihiin, meelaha tuulooyinka iyo deegaanada yaryar ah, bulshooyinka reer guuraaga ah, iyo kooxaha danyarta ah.

4. Xarumaha WAD waxay ku dadaalaan in celcelis ahaan 1 bare ku soo aado 35 arday (35:1) 1 sida dugsiyada hoose.

5. Xarumaha waxbarashada WAD ee ku haboonaan kara ardayda waxay ka mid ah:
   - Dugsiyada tooska ah ee shaqeeya hal gelin keliya.
   - Dugsiyada gaarka loo leeyahay ee shaqeeya hal gelin kadib marka lala yeesho wadahadalo iyo iskaashi.
   - Xarumaha tababarada xirfadaha haddii ay shaqeeyaan hal gelin.
   - Dhismeyaasha kale ee dawladda, kuwa gaarka loo leeyahay ama kuwa bulshada ee la isku raacay in loo adeegsado xarun WAD ah sida xarumaha haweenka, goobaha shirarka bulshada, xarumaha diinta ama guryaha gaarka loo leeyahay marka xubnaha bulshada ay si iskood ah u ogolaadaan, ama guryo iyo xarumo la kiraystay..
   - Dhisme bulshada ama hay'ad ay u dhistay in lagu bixiyo addeega WAD oo buuxiyey haldeegyada ugu yar ee WWH&TS u dejisay.

6. Haddii xarunta waxbarashada WAD ay tahay mid la dhisay, la kiraystay ama cid kale ku deeqday, mar maksta waa inay buuxisaa shuruudaha la aqbali karo ee cabbirka, tayada, badbaadadda, faya-dhowrka iyo goobaha ciyaarta.

6. Xarumaha WAD waa inay lahaadaan ugu yaraan mid kamid ah qoraallada soo socda ee ku saabsan isticmaalka dhulka: i) Warqad cadeyn lahaansho ama warqad qoondeyn ah oo ku qoran magaca xarunta ii) Heshiis kireysi ama isticimaalid deeq ah oo xarunta u ogolaanaya waqti ku filan oo ay kaga guuri karto dhismaha hadii loo baahdo.

7. Meelaha baadiyaha ah oo aysan suurtagal ahayn in laga dhiso fasallo joogto ah:
   - Geedaha hoostooda, iyada oo la tixgelinayo dabaysha iyo qorraxda, iwm in aysan wax saameyn taban ah ku yeelan carruurta iyo hannaanka barashada iyo waxbaridda.
   - Dhisme qiime jaban oo laga sameeyey agabka laga helo deegaanka jiingado bir ah, sagxadaha sibidh laga dhigayo, darbiyada loo samaynayo hawo furan, waana marka la waayo fursadaha kale.
   - Teendhada la qaadan karo.

9. Bixiyeyaasha adeega WAD ee leh ujeeddooyinka muddada dheer (ka badan hal wareeg oo buuxa oo WAD ah) waxaa lagu dhiirrigelinayaa inay sameeyaan dhisme rasmi ah oo buuxiya shuruudaha ugu yar ee ay dejiyeen WWH&TS iyo WW ee DG-yada.

### 3.4 Dhismeyaasha Xarunta WAD

1. Xarumaha WAD waa inay leeyihiin meel wax lagu kaydiyo, musqullo iyo goobaha fayadhowrka oo ku habboon lab iyo dhedigba.

2. Musqulaha waa inay ku habboon yihiin dadka naafada ah, waana in si maangal ah loogu hagaajiyaa dhismaha oo dhan si dadka naafada ahi u isticmaali karaan.

3. Dhammaan xarumaha WAD ee shaqeeya saacadaha waxbarashada caadiga ah ka dib waxaa looga baahan yahay in ay lahaadaan iftiin koronto ama mid kale oo la isku halleyn karo si loo hubiyo jawi waxbarasho oo habboon.

4. Dhammaan fasallada waa inay leeyihiin sabuurad iyo wax lagu fadhiisto oo loogu talagalay baraha iyo ardayda.

### 3.5 Aqoonsiga Ardayda, Diiwaangelinta, Haynta iyo Taageerada

1. Sababo la xiriira tirada dhallinyarada aan dugsiyada tegin ama waligood dhigan dugsiga, adeega WAD wuxuu siin doonaa dariiqyo waxbarasho.

2. Barnaamijka WAD wuxuu aqbalayaa carruurta iyo dhallinyarada dugsiyada ka maqan iyo kuwa da’da isqorista dugsiyada ka weyn (9-16 sano). Da'da ka weyn dugsiga waxaa lagu qeexaa 3 sano ama ka badan marka ardaygu ka weyn yahay da'da gelitaanka dugsiga hoose (6 sano).

3. Da'da gelitaanka ee heer kasta oo WAD ha waa:

| Heerka WAD | Da’da lagu geli karo heerarka WAD |
|---|---|
| 1 | 9-15 |
| 2 | 11-16 |
| 3 | 13-17 |
| 4 | 15-18 |

4. Bulshooyinka WAD loogu talogalay waxaa ka mid noqon doona:
   - Bulshada reer guuraaga ah
   - Carruurta darbi-jiifka ah iyo kuwa shaqeeya
   - Danyarta magaalooyinka iyo kuwa miyiga ee aan awoodin in ay caruurtooda u diraan dugsiga
   - Carruurta naafada ah, kuwa qaba cudurrada raaga iyo kuwa baahiyo gaar ah leh
   - Carruurta ku nool meelaha fog fog, xeebaha iyo tuulooyinka oo ay adag tahay in la gaaro
   - Carruurta ay saameeyeen colaadaha
   - Carruurta barakacayaasha ah
   - Dadka ka soo noqday meelaha colaaduhu ka dhaceen
   - Agoomaha, carruurta iyagu masuulka iska ah
   - Gabdhaha laga reebay waxbarashada sababo la xiriira guurka degdegga ah, hooyonimada ama shaqada guriga
   - Ardayda dugsiga ka baxday ee aan dhammaysan waxbarashada aasaasiga ah

5. Qorshaha WAD wuxuu dhiirrigelinayaa in labka iyo dhediga u sinnaadaan diiwaangelinta WAD.


6. Ardayda WAD waxaa lagu xulan doonaa wadatashi u dhexeeya bareyaasha xarunta WAD, Guddiga Waxbarashada Bulshada (GWB) iyo hogaamiyeyaasha bulshada. Ardayda wax ka baran doonta xarunta WAD waa lagala tashan doonaa saacadaha fasallada ku haboon.

7. Waa in la sameeyaa dadaal badan si bulshada loogu baraarujiyo waxbarashada gabdhaha iyo carruurta naafada ah in ay ka faa'iidaystaan barnaamijka WAD.

8. Xilliga diiwaangelinta, ardayda WAD ka faa'iidaysan doona waxaa laga qaadayaa imtixaan meelayn ah si loo go'aamiyo heerka ku habboon. Habraaca imtixaanka meelaynta waxaa dejin doona WWH&TS ama WW ee DG-yada. Madaxa bareyaasha ee xarunta WAD ayaa mas'uul ka noqon doona maamulka imtixaanka meelaynta iyo qiimaynta heerarka ardayda.

9. Dariiqada waxbarashada ee loogu talagalay ardayda WAD waxaa lagu muujiyey jaanuska 1 ee hoos ka muuqda kaas oo tilmaamaya dariiqada ee ardayda ugu gudbi karaan waxbarashada tooska ah ama goobta shaqada. Heerarka WAD fulintooda waxaa la raacayaa sanad dugsiyeedka, casharo kooban ayaa maalintii la bixinayaa waxaana lagu dhamaynayaa 4 sano.

*Jaantuska 1: Dariiqada WAD oo muujinaysa habka ardayda ku gaadhayaan imtixaanka fasalka 8aad*



10. Bareyaashu waxay ardayda WAD siin doonaan la talin iyo hagitaan ku saabsan dariiqooyinka waxbarasho ee kor ku xusan. Tan waxaa lagu dari doonaa tababarada baraha WAD la siiyo. La-talinta iyo hagitaanku waxa ay diiradda saaraan horumarka ardayda WAD iyo u wareegida waxbarashada tooska ah, xarumaha tababarka xirfadaha ama goobta shaqada.

11. Marka ay suurtagal tahay, Guddiga Waxbarashada Bulshada, ama bixiyaha waxbarashada WAD waa inay ardayda nugul siiyaan kaalmo dheeri ah sida lacagta ama wax kaleba.

12. Marka ay suurtagal tahay, waan in la siiyo deeq waxbarasho ama deeq lacageed gabdhaha iyo ardayda nugul ee barta WAD si ay ugu wareegaan waxbarashada tooska ah oo ay halkaa ku sii jiraan ilaa waxbarashadooda aasaasiga ah ay ka dhameystaan.

### 3.6 Manhajka, Qaabka iyo Saacadaha Waxbarista

1. WWH&TS waxa ay hiigsanaysaa in barnaamijka WAD yeesho manhaj waxbarasho oo rasmi ah, isku cufan, lana dedejiyey kaasoo waafaqsan Qaabdhismeedka Manhajka Qaranka (2017), manhajka WAD waa inuu tixgelin xasaasi ah siiyaa sinnaanta labka iyo dhediga, da'da ku habboon, waa in manhajkan loo addeegsado qaab waxbarista iyo qiimaynta oo ku habboon si loo daboolo baahiyaha ardayda WAD arrintaas oo awood u siinaysa ardayda in ay gaaraan shahaadada Fasalka 8aad.

2. Waa in la diyaariyaa lana heli karaa habraaca dhaqangelinta iyo agab ku habboon ardayda WAD sida hagayaasha baraha, buugaagta wax laga barto iyo waxyaalaha la akhristo ee loogu talagalay ardayda.

3. Barnaamijka WAD oo ku habboon bartyeaasha, awoodna u siinaya in ay 4 sano ku dhameeyaan waxbarasho u dhiganta waxbarashada dugsiga hoose/dhese oo 8 sano ah.

4. Waxaa waajib ah in lagu dhaqmo oo la fulliyo saacadaha waxbarista si loo dhammeeyo casharada, ardayduna ay awooddaan in ay ku tababartaan xirfado cusub iyada oo mar kasta la ilaalinayo dabacsanaanta iyo ku habboonaanta baahiyaha ardayda iyo bulshada. Tusaale ahaan, Heerka 1 iyo 2 waxaa casharadooda la dhigi karaa laba jadwal oo waqti kala duwan ah kadib marka lala tashado ardayda iyo bulshada. Si kastaba ha noqotee, dhamaadka heer kasta waa inuu la jaanqaadayaa imtixaannada kama dambaysta ah ee dhamaadka sanad dugsiyeedka ee WWH&TS iyo WW ee DG-yada ay dejiyeen. Hoos ka eeg tirada casharrada iyo saacadaha heer kasta. Xusuusnow halkan laguma muujin saacadaha imaatinka, nasashada iyo rawaxaada.

   Saacadaha waxbarista ee heer kasta oo todobaadkiiba 6 maalmood ah:

| Heerka | # Casharada | # Saacadaha maalinlaha ah | # Casharada todobaadka | # Saacadaha todobaadka | # Casharada halkii heer |
|---|---|---|---|---|---|
| 1 | 5 | 3 hr 20 m + | 30 | 20 | 1080 |
| 2 | 5 | 3 hr 20 m + | 30 | 20 | 1080 |
| 3 | 6 | 4 hr + | 36 | 24 | 1296 |
| 4 | 6 | 4 hr + | 36 | 24 | 1296 |

5. Manhajka WAD iyo waxqabadyadiisa dheeraadka ah waxay kaabayaan ladnaanta nafsiga ah ee carruurta, waxqabadkooda aqooneed, iyo horumarkooda guud. Iyada oo loo marayo hab dhaqanka waxbarista habboon ee xaqiiqada ee ku saleysan, bareyaasha iyo shaqaalaha xarunta waxaa lagu tababarayaa inay xarunta WAD ka abuuraan jawi wanaagsan oo aamin ah iyo inay ka caawiyaan ardayda inay naftooda, shucuurtooda iyo garaadkooda ka warqabaan, taasoo ay weheliso xallintata khilaafaadka, inay yool leeyihiin, iyo xidhiidh fayow oo ardaydu la yeeshaan bulshada.

6. Ilaalinta deegaanka, waxbarashada nabada iyo xirfadaha nolosha ku habboon ayaa lagu dhex daray manhajka WAD.

7. Manhajka WAD waa mid isku duuban oo isku dhafan (si toos ah iyo si dadban) kaas oo la jaanqaadaya mirodhalka waxbarashada manhajka dugsiga tooska ah. Heer kasta oo WAD ah wuxuu u dhigmaa 2 heer oo waxbarashada tooska ah.

   Manhajka isku cufan waxaa la yareeyey maadooyinka aasaasiga ah si loo wanaajiyo tayada waxbarashada iyada oo la kordhinayo tirada saacadaha uu ardaygu ku qaato maado kasta.

   Heerarka WAD waxa ay leeyihiin maadooyinka soo socda:

| **Heerarka WAD** | **Maadooyinka WAD ee u dhigma dhameystirka Fasalka 8aad ee Dugsiga Hoose / Dhexe** |
|---|---|
| 1 | 1. Af Soomaali,<br>2. Xisaab,<br>3. Carabi / Tarbiayadda Islaamiga ah |
| 2 | 1. Af Soomaali,<br>2. Xisaab,<br>3. Carabi / Tarbiayadda Islaamiga ah,<br>4. Saynis / Cilmiga Bulshada<br>5. Af Ingiriisi |
| 3 | 1. Af Soomaali,<br>2. Xisaab,<br>3. Carabi<br>4. Tarbiayadda Islaamiga ah<br>5. Saynis / Technology<br>6. Cilmiga Bulshada/<br>7. Af Ingiriisi |
| 4 | 1. Asoomaali / Business skills<br>2. Xisaab<br>3. Carabi<br>4. Tarbiyada Islaamiga ah<br>5. Saynis / Technology<br>6. Cilmiga Bulshada<br>7. Af Ingiriisi |

**Xusuusin**

| | |
|---|---|
| Heerarka 1-2: | Af Carabiga iyo Tarbiyada Islaamiga ah waxay noqonayaan hal maaddo oo isku dhafan |
| Heerka 1: | Cilmiga bulshada waxaa lagu dhafayaa Af Soomaaliga |
| Heerka 2: | Maadooyinka isku dhafan waxaa lagu lamaaninayaa cilmiga bulshada iyo sayniska |
| Heerarka 3 - 4: | Maadooyinka isku dhafan waxaa lagu lamaaninayaa cilmiga bulshada, sayniska iyo tiknoolojiyada |
| Heerka 4: | Xirfadaha ganacsiga waxaa lagu dhafayaa Af Soomaaliga |

9. Muhiimadda heerarka hoose waxay noqon doontaa in la dhiso aasaas adag oo xagga akhriska iyo qorista ah (afafka Soomaaliga, Carabiga iyo Ingiriiska), xisaabta iyo xirfadaha nolosha si ardayda awood ugu yeeshaan inay bartaan maadooyinka kale ee muhiimka ah.

10. Qaabdhismeedka Siyaasadda WAD wuxuu taageeraa manhaj ka hadlaya arrimaha soo socda:
    - Waxa uu la jaanqaadayaa mirodhalka aqooneed ee Fasallada 1-8.
    - Mirodhalka barashada ee afarta heer ee barnaamijka WAD waa inay la jaanqaadaan manhajka caadiga ah ee dugsiga si loo xaqiijiyo in carruurta iyo dhallinyardu ay ku guulaystaan inay dib ugu soo galaan dugsiyada tooska ah.
    - In manhajku noqdo mid aqoon ku saleysan (ujeedooyinka iyo waxa ay baran doonaan ardaydu taasoo la cabbiri karo, la gaari karo oo maangal ah).
    - Waa in la waafaqo siyaasadda waxbarashada qaran ee ku saabsan luuqadda wax lagu barto (Siyaasadda Waxbarashada Qaranka 14.1.3: Siyaasaddu waxay dhigaysaa in afka hooyo ee Soomaaliga loo adeegsan doono waxbarista fasallada aasaasiga ah (1 ilaa 8).
    - Waa inuu noqdo mid ku habboon nolosha ardayda iyo bulshadooda.
    - Waa inuu xoojinayaa aqoonta iyo xirfadaha ardayda lahaayeen markii hore.
    - Waa inu unoqdo mid labka iyo dhediga ay si siman u heli karaan, texgelin siman sinaya, kuna habboon kooxaha kale ee tabaalaysan sida carruurta naafada ah.
    - Inuu noqdo mid ku salaysan baahida ardayda, casharada loo bixiyo hab wadashaqayn ah oo waxqabad ku saleysan.
    - Dhiirrigelinta muwaadinnimo mas'uuliyad leh, dulqaad, tixgelin dhaqan, iyo wacyigelin.
    - In lagu daro tiknoolajiyadaha, lana dhiirrigeliyo xirfadaha qarniga 21aad muhiimka noqday, isgaarsiinta, go'aan gaarista, ka fekerida arrimaha muhiimka ah iyo hal-abuurka.
    - In xoogga la saaro adeegsiga aqoonta iyo xirfadaha.
    - In la adeegsado waxyaalada deegaanka lagu soo saaro ama lagu sameeyo.
    - Kor u qaadida isku-filaanta qofka.
    - Dhiirrigelinta adeegsiga akhris-qorista iyo xisaabta ee dhinacyada kala duwan ee maadooyinka.
    - In si cad loo adeegsado qiimaynta joogtada ah iyo qiimaynta ugu dambaysa si loo ogaado guulaha waxbarasho ee ardayda, caqabadaha, iyo u diyaargarowga u gudubka heerka WAD ee ku xiga ama u gudubka waxbarashada tooska ah.
    - Mar kasta o ay suurtogal tahay, nuxurka casharadu waa inuu ku bilowdaa kuwa fudud laguna xejiyaa kuwa adag.
    - Nuxurka casharada iyo ereyada la addeegsanayo waa inay ku habboon yihiin oo u dhigmaan heerka aqooneed ee bareyaasha iyo ardayda.
    - Waa in manhajka WAD gaadhsiiyaa ardayda heerka aqooneed ee shahaadada Fasalka 8aad oo ay aqoonsan tahay WWH&TS si loogu oggolaado ardayda in ay galaan ama u gudbaan waxbarasho toos ah iyo fursado kale oo waxbarasho.
    - In la siiyo fursado waxbarasho oo mudo dheer ah (inta qofku nool yahay).

11. Dhaqangelinta manhajka WAD waxaa lagu samaynayaa la socod, qiimayn iyo jawaab celin joogto ah oo wax ku ool ah, iyada oo ay qorshaha ku jirto wanaajin joogto ah in la sameeyo.

12. Dhammaan manhajka WAD ee heer kasta waa in la cusbooneysiiyaa iyada oo la tixraacayo dib-u-eegista lagu sameeyo manhajka guud ee dugsiga hoose, si loo hubiyo in barnaamijyada WAD waafaqsan yihiin manhajka qaranka taasoo keenaysa in ardaydu u gudbi karaan waxbarashada tooska ah.

### 3.7 Agabka Waxbarista iyo Barashada

1. Dhammaan urrarada ka taageeraya WWH&TS dhaqangelinta barnaamijka WAD waa in ay adeegsadaan agabyada iyo sahayda WAD si isku mid ah.

2. Xarumaha WAD bixiya waxaa aggabka soo gaadhsiin doona WW ee DG-yada iyo fuliyeyaasha kale ee WAD. Agabka waxaa ka mid noqon doona; qoraallada ardayda; hagaha baraha, buugaagta xaadirinta iyo qiimaynta; qalabka aasaasiga ah ee wax lagu barto ee ardayda iyo agabyada kale ee la xiriira waxbarashada sida buugaagta akhriska.

3. WWH&TS waxa ay mas'uul ka tahay daabacaadda iyo u qaybinta agabyada waxbarista iyo barashada dhammaan xarumaha WAD. Fuliyeyaasha aan dawliga ahayn ee WAD waa in ay ogolaansho ka helaan WWH&TS, waxayna mas'uul ka yihiin daabacaadda iyo qaybinta qalabka waxbaridda iyo barashada.

4. Dhammaan qalabka waxbarista iyo barashada waa in la keydiyaa marka aan la isticmaalayn.

5. Saamiga ugu yar ee buugga akhriska ee maaddo kasta ee Heerka 1 iyo 2 waa inuu ahaadaa 3:1, (sadexdii arday hal buug) halka Heerka 3 iyo 4 uu noqon doono ugu yaraan 2:1 (labadii arday hal buug).

6. Qalabka caawiya waxbarista iyo barashada (alaabo dhab ah, sawirada, khariidadaha, alaabo tusaale ah, jaantusyada, iwm.) ayaa loo diyaarin doonaa iyada oo ay ka qeyb qaadanayaan bareyaasha, ardayda iyo waalidiinta si ay u taageeraan manhajka WAD.

7. Dhammaadka heer kasta, buugaagta akhriska waa la ururin doonaa oo la keydin doonaa si ay u isticmaalaan ardayda cusub ee WAD sannadka soo socda.

8. Agab madadaalo iyo qalabka cayaaraha oo aan qaali ahayn kuna habboon wiilasha iyo gabdhaha waa in la siiyaa xarumaha WAD si ay uga caawiso dhiirrigelinta ardayda.

### 3.8 Qiimaynta Horumarka Ardayda iyo Bixinta Shahaadooyinka

1. WWH&TS waxay sameyn doontaa qiimayn ku saabsan horumarka ardayda ee dhinacyada barashada, waxayna samayn doontaa baadhis xiliyeed si loo ogaado caqabadaha, kadibna loo diyaariyo sidii loo xalin lahaa.Sidoo kale WWH&TS waxay hogaamisaa dejinta habraacyada qiimaynta ee aqoonta ku salaysan oo u gaar ah manhajka WAD si loo xaqiijiyo aqoonsiga ardayda u oggolaanaya in ay u gudbaan waxbarashada dugsiga sare.

2. WW ee DG-yada waxay samayn doonaan qiiman ku saabsan horumarka ardayda iyo qaadista imtixaanka. meelaynta ardayga, qiimayn iyo baadhis joogto ah si loo ogaado caqabadaha waa in lagu saleeyaa xarumaha WAD. Waaxda Imtixaanka WW ee DG-yada waa inay:
   - Hogaamisaa fulinta habka qiimaynta oo ku saleysan aqoonta
   - Maamushaa qaadista imtixaannada dhammaadka heerka 4 iyo shahaado siinta la socota. Cadayn la xiriirta aqoonta ay barteen ayaa la siin karaa ardayda aan awooddin in ay u fariistaan Imtixaanka dhammaystirka aasaasiga ah ee Fasalka 8aad.
   - Gudbinta mirodhalka imtixaannada ee xarumaha WAD.

3. Qiimaynta iyo meelaynta ardayga waa in la sameeyaa ka hor inta aan la diiwaangelin ardayga, taas oo caawinaysa in ardayga la fadhiisiyo heerka ku habboon.

4. Ardayda waa in lagu sameeyo qiimayn xilliyeed si loo hubiyo in ay buuxiyeen shuruudihii loogu gudbi lahaa heerka xiga ee WAD. Qiimayntan heerka ku saleysan waxaa samaynaya bareyaasha WAD waxayna raacayaan hab qiimayneed rasmi ah. Gudoomiyaha Waxbarashada Degmada (GWD) ayaa la soconaya oo kormeeraya qiimaynta. Mirodhalka qiimaynta waxaa lagu diyaarinayaa xarunta iyada oo ardayda iyo waalidiintana la ogeysiiynayo. Qiimaynta dhamaadka heerka waxaa warbixinteeda loo gudbinayaa Gudoomiyaha Waxbarashada Degmada (GWD) iyo Gudoomiyaha Waxbarashada Gobolka (GWG) si loogu diiwaangeliyo Habka Maamulka Xogta Waxbarashada (HMXW) ee WW ee DG-yada iyo WWH&TS.

5. Ardayda WAD ee u gudbaya fasalka da'diisa ku habboon ee dugsiyada tooska ah waa inay soo bandhigaan mirodhalka qiimaynta dhammaystirka heerka WAD ay soo qaateen ama waa inay ku guulaystaan imtixaanka gelitaanka fasalka ee ku habboon. Khidmadda imtixaanada lagama qaadayo ardayda WAD.

6. Fuliyeyaasha WAD waa inay qiimeeyaan ardayda ku jira Heerka 4 ee ku habboon inay u fadhiistaan imtixaanka dhammaystirka Fasalka 8aad, waana inay WW ee DG-yada u soo gudbiyaan magacyada ardayda u sharaxan waqtigii loogu talagalay iyagoo soo raacinaya qoraallada la xiriira. Waa in la xaqiijiyo in la heli karo xarun imtixaan oo diiwaangashan. Waana in ardayda u fadhiisanaysa imtixaanka fasalka 8aad loo diyaariyo gaadiid lagu geeyo goobta imtixaanka ay ku gelayaan. Bixiyaha WAD iyo / ama GWB waa in ay bixiyaan khidmadda imtixaanka ee murashax kasta oo imtixaannada u fadhiisanaya.

6. Ardayda WAD ee si guul leh u dhammaystiray Heerka 4aad laakiin aan u fadhiisan imtixaanka dhammaystirka Fasalka 8aad, waxaa la siin doonaa shahaadada dhammaystirka WAD ee fududeyn doonta gelitaanka waxbarashada dadka waaweyn, iyo xarumaha tababaradda farsamada XFTX, waxayna u fadhiisan karaan imtixaannada gelitaanka waxbarashada ay doonayaan.

7. Mirodhalka dhammaystirka heerka 4 ee WAD waxaa diraysa WW ee DG-yada waxaana loo soo gudbinayaa Guddoonka Waxbarashada Degmada (GWD), isagoo u qaybin doona ardayda shahaadooyinka ay oggolaadeen WW ee DG-yada.

8. Dhammaan mirodhalka dhammaystirka Heerka 4 ee WAD iyo mirodhalka WAD ee imtixaannada dhammaystirka Fasalka 8aad waxaa lagu soo ururin doonaa qaybta waaxda Waxbarashada Dadban (WD) waxaana looga warbixin doonaa loona falanqeyn doonaa si ka duwan mirodhalka waxbarashada tooska ah.

## 3.9 Shaqaalaynta, Hormarinta Xirfada, Qiimaynta iyo Abaalmarinta Baraha

Waaxda Horumarinta Macallimiinta (WHM) ee WW ee DG-yada iyada oo la tashanaysa Waaxyda Maaliyada iyo Shaqaalaha, waxaa loo xilsaaray in ay qorto, hawlgeliso, kala bedesho, anshax mariso, oo ay ilaaliso heerarka xirfadeed ee wanaagsan ee dhammaan macallimiinta ka shaqeeya dugsiyada dawaladda iyo bulshada iyada oo qaadaysa talaabooyin lagu hubinayo tayada.

### 3.9.1 Shaqaalaynta Baraha

1. Mar kasta oo ay suurogal tahay, waxaa la raacayaa shuruudaha dowladda u dejisay, oo ay ku jiraan heerka aqoonta, shahaadooyinka iyo diiwaangelinta sida ku cad Siyaasadda Macallinka 2020.

2. Baraha WAD wuxuu noqon karaa qof buuxiyey shuruudaha soo socda;
   - Macallin ka diiwaangashan WW ee DG-yada ama WWH&TS
   - Macallin tababaran oo diyaar u ah in lagu tababaro habka WAD.
   - Shaqsi da'diisu ka weyn tahay 19 sano oo leh khibrad dugsiga sare ka saraysa ama ka qalin jabiyey dugsiga sare oo doonaya in loo tababaro bare WAD ah.
   - Qof qaatay tababar WAD ah, lehna khibrada baraha WAD.
   - Qof leh hufnaan wanaagsan, oo aan lahayn wax dambi ah, maskax ahaan fayow oo aqoon wanaagsan iyo mid xirfadeed ku leh bulshada dhexdeeda
   - Qof aqoon u leh afka iyo dhaqanka deegaanka.
   - Inuu noqdo qof ay aqbali karaan bulshadu, iyagana dhex degan.

3. Mudnaanta waxaa la siin doonaa shaqaalaynta haweenka inay noqdaan bareyaal si loo dhiirrigeliyo iyada oo la hubinayo jawi aamin ah oo ay ku noolaadaan. Marka dumar yar soo codsadaan shaqada baraha, waa in dadaal la sameeyo in dhammaantood wareysi laga qaado.

4. Habraaca qorista baraha wuxuu ka kooban yahay talaabooyinka soo socda:
   a) WW ee DG-yada waxaa lagu wargalin doonaa baahida loo qabo qorista bareyaasha WAD.
   b) Xayeysiis loogu talagalay booska baraha WAD ayaa lagu baahinayaa warbaahinta guud ee ay aqoonsan tahay WW ee DG-yada iyo WWH&TS oo ay ku jiraan raadiyaha, baraha internet-ka wadanka, looxada ogeysiiska ee xafiisyada GWG / GWD ama bulshada dhexdeeda.
   c) Guddiga Waxbarashada Bulshada (GWB) waxay xulan doonaan musharaxiinta ku habboon waxayna ku talabixin doonaan shaqaalaysiinta baraha WAD.
   d) Musharrixiinta waa la soo xuli doonaa in waraysi laga qaado iyada oo lagu saleynayo ku habboonaanta doorka baraha WAD.
   e) Wareysiyada baraha WAD waxaa qaban doona guddi ka kooban: Guddoonka Waxbarashada Degmada (GWD), gudoomiyaha GWB, madaxa bareyaasha xarunta maxaliga ah iyo wakiil ka socda fulliyaha WAD
   f) Musharixiinta guuleysta waxaa warqad magacaabis ah siin doona fulliyaha WAD oo waliba uu la saxiixayo GWD.
   g) Gudiga waxaa laga filayaa inuu xafido diiwaanka dhammaan heerarka xayeysiinta; diiwaangelinta musharixiinta, qiimaynta codsadayaasha xiliga wareysiga iyo shaqaalaynta si loo hubiyo hufnaanta iyo tixraaca mustaqbalka haddii ay soo baxaan cabashooyin xaga murashaxiinta ama hadii bare beddel ah loogu baahdo si degdeg ah.

5. Haddii bulshadu weydo qofkii ay raadinaysay, sida ku cad shuruudaha la dejiyay, waa inay ka raadsataa bulshooyinka iyo deegaanada ku dhow.

6. Waxaa la shaqaalayn karaa bare caawiye ah marka la waayo haween bare ah ama afka hooyo caqabad ka jirto. Marka xaaladahaasi jiraan, waa arrin oggolaanaysa ugu yaraan u-qalmitaanka kaaliyaha bareyaasha ee Fasalka 8aad ee imtixaanka dhammaystirka waxbarashada aasaasiga ah.

7. Dhammaan bareyaasha WAD ee la shaqaaleeyay waa inay saxeexaan Xeerka Anshaxa Macallinka ee WWH&TS.

8. Dhammaan bareyaasha WAD ee la shaqaaleysiiyay (kuwa u qalma iyo kuwa keleba) waxaa looga baahan yahay inay iska diiwaangeliyaan WW ee DG-yada. Waxaa la siin doonaa muddo ay ku qaadan doonaan tababar iyagoo shaqada ku jira markaana si buuxda loo diiwaangeliyo. Habraacani wuxuu u hogaansami doonaa Siyaasadda Macallinka ee 2020.

Siyaasadda Macallinka 2020

- Macallimiinta [bareyaasha] diiwaangashan waxaa la siin doonaa tiro diiwaangelin shaqsiyeed kaasoo noqon doona aqoonsi muhiim u ah baraha uguna jiri doona qeybta Diiwaanka ee Waaxda Horumarinta Macalimiinta WHM.
- Dalbo isdiiwaangelinta adigoo buuxinaya waraaqaha laga heli karo Waaxda Horumarinta Macallimiinta, Muqdisho
- Waraaqaha waa inay la socdaan nuqulo la ogolaaday caddaynaya in codsaduhu yahay macallin xirfad leh.
- Shahaada siinta waxaa samayn kara WWH&TS ama WW ee DG-yada, waana in si la taaban karo loo arko shahaadadii asalka ahayd ee macalinka ama baraha lalana wadaago Waaxda Horumarinta Macalimiinta WHM.

### 3.9.2 Horumarinta Xirfadaha iyo Qiimaynta Waxqabadka

1. Waaxda Horumarinta Macalimiinta ee WWH&TS iyo WW ee DG-yada waxay iskaashi farsamo la yeelan doonaan kulliyadaha waxbarashada ee sumcada leh, si loo diyaariyo, loo ansaxiyo qaababka tababarka WAD shaqogalka ka hor iyo shaqogalka ka dib, qaababkaas oo qayb ka noqonaya tababarka 2 sano ee macalimiinta dugsiyada hoose. Qaabka tababarka WAD waa in ay ku jiraan habka waxbarista waxbarashada la dedejiyey, xeeladaha maamulka iyo barashada manhajka waxbarashada degdega ah. Dhammaan agabyada waxaa ansixin doona WWH&TS, waxayna noqon doonaan kuwa rasmiga ah ee ay isticmaalayaan fuliyeyaasha iyo bixiyeyaasha WAD iyo dugsiyada dowladda ee fuliya barnaamijyada WAD.

2. Tababbarka ka horeeya shaqogalka waxaa fulin doona tababareyaal ka socda kulliyadaha waxbarashada, kormeerayaasha tababaran ee WW ee DG-yada iyo macallimiin aqoon leh oo ay shaqaalaysiisay WWH&TS. Si ay u bixiyaan taageero farsamo iyo hubin tayo, waa in ay aqoonsan yihiin oo ku jiraan kaydka xogta WWH&TS iyo WW ee DG-yada. WWH&TS waxay dejinaysaa heerarka lacagta iyo gunnooyinka kale si loo balaadhiyo tiradda tababareyaasha.

3. Dhammaan bareyaasha WAD waa in ay ka qaybgalaan tababarka ka horeeya shaqogalka ee WWH&TS oggolaatay iyo tababar joogto ah oo aqoon qaadasho ku dhisan (ugu yaraan 3 maalmood sanadkiiba) oo la qabto fasaxyada dugsiga. Tababbaradu waa in ay xooga saaraan aqoonta iyo cilmiga maadada, iyo waliba hababka waxbarista iyo barashada ee gaarka u ah barnaamijyada WAD. Bareyaasha WAD waxaa la siin doonaa fursado horumar xirfadeed oo isdabajoog ah oo isku xidhan iyada oo loo marayo tababarka shaqogalka ka dib, wax-is-barista, wax-ka-barashada dadka kula shaqeeya, haggida iyo aqoon dirsadka.

4. Tababarada hore kadib, tababarayaasha iyo kormeereyaasha WAD iyo Guddoonka Waxbarashada Gobolka (GWD) waxay bareyaasha siin doonaan hagitaan xilliyada kormeerka, si loo hubiyo in agabka manhajka WAD iyo qalabka kale ee waxbarista loo adeegsado si wax ku ool ah iyo in talo bixin laga siiyo su'aalaha iyo baahiyaha ka imanaya bareyaasha. Tani waxay WWH&TS iyo WW ee DG-yada siinaysaa fursad lagu sii hagaajiyo agabka tababarka iyo waxyaalaha baruhu adeegsado iyo waxyaalaha laga bartay xarunta WAD.

5. Bareyaasha WAD waxaa la siin doonaa fursad ay ku sii wataan koorsooyinka tababarka macallimiinta xilliyada fasaxa ama isticmaalaan aaladaha internet-ka.

6. Madaxa baraha WAD iyo shaqaalaha xarunta WAD waa inay si joogto ah oo qaabaysan u kormeeraan hawl-maalmeedka baraha, oo ay ku jiraan korjoogtaynta fasalka dhexdiisa ah. Baraha waa in la siiyo jawaab celin ku saabsan waxqabadkiisa, lagana caawiyo qorshaynta shaqadiisa. Kormeereyaashu waa in ay u fiirsadaan in baruhu adeegsanayo hababka, qaababka iyo agabka waxbarista la ansixiyey ee manhajka WAD.

7. Qiimaynta waxqabadka baraha waxaa la samaynayaa sedexdii biloodba hal mar, waxaana samaynaya mid ka mid ah; Gudoomiyaha Waxbarashada Gobolka (GWG) ama Degmada (GWD), Guddiga Waxbarashada Bulshada (GWB), Madaxa xarunta WAD, shaqaalaha fuliyaha WAD ama khabiirada WAD. Waa in ay qiimeeyaan sida bareyaashu u adeegsadaan agabka la ansixiyay ee waafaqsan manhajka, dhaqangelinta habka waxbarista iyo hawl-gudashada guud. Baruhu waa inuu ka qaybgalaa qiimaynta si loo helo isfaham ku saabsan arrimaha laga doonayo in baruhu sii wanaajiyo.

### 3.9.3 Mushahaarka

1. WWH&TS waxay isugeyn doonaa xogta mushaharka la siiyo bareyaasha WAD ee u shaqaalaysan WWH&TS, WW ee DG-yada iyo fuliyeyaasha kale si loogu sameeyo habraac maaliyaydeed iyo gunno siin rasmi ah oo is-waafaqsan.

2. Bareyaasha WAD waa in ay helaan mushahar joogto ah oo u dhigma saacadaha ay wax baraan toddobaadkiiba. Bixiyeyaasha WAD ee gunnooyinka siiya bareyaasha aysan shaqaalayn dawladdu waa in ay ku dadaalaan bixinta mushahaar ama gunno u dhiganta heerarka ku qeexan Siyaasadda Macallinka (2020).

3. Bulshooyinka waxaa lagu dhiirrigelinayaa in ay helaan qaab ay gunno ku taageeraan bareyaasha ilaa iyo inta ay ka helayaan maalgelin ka timaada fuliyeyaasha WAD ama WWH&TS iyo WW ee DG-yada.

4. Dhammaan bareyaasha xarumaha WAD ee dawladda waa inay ku jiraan liiska mushaharka WWH&TS. Madaxa bareyaasha xarunta WAD waxaa la siinayaa gunno dheeraad ah maadaama masuuliyadaasi la imaanayso shaqo dheeraad ah.

6. Bareyaasha ka hawlgala deegaanada fog ama xarumaha wareega waxaa la siinayaa gunno ku habboon kuna salaysan shaqada adag ee ay qabtaan taas oo xaqiijin doonta in shaqaale loo helo deegaanada durugsan ama kuwa guurguura.

7. Bareyaasha haweenka ah waxaa la siinayaa gunno ku habboon si loo xaqiijiyo in dumarku si joogto ah uga hawlgalaan xarumaha WAD,

### 3.10 Kormeerka, Qiimaynta, Cilmi Baarista iyo Cadeymaha

1. WWH&TS waxa ay xoojin doontaa hababka kormeerka iyo hubinta tayada ee barnaamijyada WAD iyada oo taageero ka heleysa fuliyeyaasha WAD ee ku howlan xoojinta tayada WAD ee Soomaaliya. Hawlaha muhiimka ah waxaa ka mid noqon doona; a) In la diyaariyo agabka kormeerka WAD kaas oo si joogto ah loogu hubin doono tayada waxbarista iyo barashada WAD, iyo maaraynta xarumaha .b) in tababaro la siiyo dhammaan dadka ka hawlgala WAD, oo ay ku jiraan shaqaalaha WWH&TS iyo WW ee DG-yada iyo guddiga waxbarashada bulshada (GWB) waxaana lagu tababarayaa xog ururinta, jawaab celin ayaana la siin doonaa maamulayaasha iyo bareyaasha si ay u wanaajiyaan meelaha dhaliishu ka jirto. Agabka tababarada waxaa ku jiri doona habraaca kormeeraha si uu hagid u siiyo bareyaasha inta lagu guda jiro booqashooyinka kormeerka xarunta WAD, waxayna taasi agab muhiim ah u noqon doontaa Guddoonka Waxbarashada Gobolka iyo Gudoonka Waxbarashada degmada.

2. Habka kormeerka iyo qiimaynta (K&Q) ee barmaamijyada WAD wuxuu waafaqsanaan doonaa HMXW (EMIS) ee WWH&TS iyo WW ee DG-yada si loo soo ururiyo, loo lafaguro, looga warbixiyo, xogta saxda ahna loogu addeegsado hagaajinta barnaamijka. Waxaa la diyaarinayaa oo la haynayaa habka HMXW ee xarumaha, ardayda, iyo bareyaasha WAD leeyihiin si loo helo xog diiwaangashan oo joogto ah guulaha ardayda, tababarada bareyaasha iwm. HMXW waxaa laga helayaa xog sax ah oo kala soocan, oo looga faa'iidaysan doono qorshaynta iyo bixinta addeeg ka fiican sidii hore.

3. Hoos waxaa ku qoran tilmaameyaal muhiim ah oo loo adeegsan doono kormeerka iyo iyo qiimaynta barnaamijka WAD;
   - % inta carruurta da'da dugsiyada ka weyn, carruurta ka maqan dugsiyada iyo dhallinyarada bulshada deegaanka ee iska diiwaangeliyey WAD
   - % inta ardayda WAD ee ka gudba heer una gudba heerka ku xiga
   - % inta ardayda WAD ee ka baxa halkii heerba
   - % inta ardayda WAD ee ku guulaysta imtixaanka dhameystirka aasaasiga ee Heerka 4 ama Fasalka 8aad
   - % inta ardayda WAD dhameystay ee ku wareega waxbarashada tooska ah, waxbarasho kale, ama habnololeedka caadiga ah

4. Barnaamijka WAD wuxuu adeegsan doonaa habka kormeerka iyo qiimaynta (K&Q) oo laga wada qayb qaato. Wakiillada bulshada oo ay ku jiraan carruurta, Guddiga Waxbarashada Bulshada (GWB), WW, (Guddoonka gobolka iYo degmada GWG iyo GWD), bixiyeyaasha WAD, shaqaalaha WW ee DG-yada iyo xarumaha WAD ayaa ka qayb qaadan doona bixinta, uruurinta xogta iyo falanqaynta mirodhalka.

5. Warbixinnada ka soo baxa ee laga diyaariyo Kormeerka iyo Qiimaynta (K&Q) waa la qaybinayaa iyada iyada oo ujeedaddu tahay kaydinta iyo waxkabedelka siyaasaddaha. Natiijada K&Q ee daneeyayaasha waxaa lagu kaabayaa cilmi baaris iyo qiimayn lagu sameeyo waxbarashada carruurta dugsiyada ka maqan, kuwa ka weyn da'da dugsiya (CDhDM) si loo soo saaro xog leh caddeyn taasoo oo adeegsanayo I lagu horumariyo barnaamijyada WAD.

# 4. CUTUBKA AFRAAD: QORSHEYNTA IYO MAAMULKA SIYAASADDA

## 4.1 Qorshaynta iyo Dejinta Miisaaniyadda

1. Waxaa loo qareemayaa ama ololenayaa in WAD lagu daro miisaaniyaddaha waxbarashada WW ee DG-yada iyo WWH&TS ee heer Qaran si loo hubiyo barnaamij waaritaan leh.

2. Marka ay suurtagal ka tahay, waa in fuliyeyaasha WAD shuruud looga dhigo inay la yimaadaan maalgelin waqtiyaysan oo la saadaalin karo taas oo dabooli karta wareegga WAD oo dhamaystiran oo ay ugu yar tahay 4 sano si loo xaqiijiyo in ardayda iska diiwaangeliyey Heerka 1 ay awoodi doonaan inay dhameystiraan ilaa Heerka 4.

3. WWH&TS iyo WW ee DG-yada waxa ay xaqiijin doonaan in waaxyaha waxbarashada tooska ah iyo qaybaha waxbarashada dadban (taasoo WAD ay qayb ka tahay) ay ka wada shaqeeyaan qorshaynta iyo bixinta aqoonsiga iyo shahaadooyinka.

4. Miisaaniyaddaha WAD waxaa ka mid ah dayactirka xarumaha iyada oo lala kaashanayo dugsiyada rasmiga ah, bulshada iyo degmooyinka.

5. Waa in heer qaran iyo heer maamul goboleedba la diyaariyo qorshe fullineed ee barnaamijka WAD, kaas oo wata qiimayn ku saabsan kharashka ku baxaya.

## 4.2 Maamulka iyo Isku-dubbaridka Barnaamijyada

1. WWH&TS waxa ay qaadan doontaa doorka hoggaaminta, kormeerka, isdhexgalka, iskudubbaridka iyo maaraynta guud ahaan barmaamijyada WAD si loo wanaajiyo qaybinta adeegga, helitaanka iyo tayada. Iyada oo wadashaqayn dhow lala yeelanayo WW ee DG-yada iyo heerarka iyo waaxaha kale ee dowladda, waxaa la dejinayaa habka qorshaynta iyo maamulka WAD si kor-ka-eegis tayo leh oo joogto ah loogu hayo barnaamijka WAD.

2. WWH&TS waxa ay hirgelin doontaa shirka iskuxidhka hawlaha barmaamijyada WAD oo sadex biloodle ah, kaas oo qayb ka noqonaya kooxda ka shaqaysa Waxbarashada Dadban. Ka qeybgalayaasha waxaa ka mid noqon doona WW ee DG-yada, saraakiisha WWH&TS ee u xilsaaran WAD. Kulamadu waxay keenayaan wadashaqayn, wada-qorshayn iyo in xogta la isweydaarsado.

3. WWH&TS warbixin joogto ah ayey siinaysaa Guddiga Bahda Waxbarashada GBW ee qaran si wadajir loogu waajaho waxna looga qabto arrimaha khuseeya qaybaha kala duwan, iyada oo la iswaafajiynayo xeeladaha iyo qorsheyaasha wax looga qabanayo sababaha aasaaska u ah carruurta dugsiyada ka maqan iyo kuwa ka weynaadey da'da isqorista dugsiyada (CDhDM).

4. WWH&TS, Kooxaha ama ururada ka shaqeeya WAD, Wasaaradaha Waxbarashada ee maamul goboleedyada, Guddoonka Waxbarashada Gobolka iyo Degmada (GWG, GWD), fuliyeyaasha WAD, iyo guddiyada bulshada waxay ka qayb qaadanayaan qorshaynta, dhaqangelinta iyo kormeerka barnaamijyada WAD.

5. WWH&TS iyo WW ee DG-yada waxa ay xaqiijin doonaan in barnaamijyada WAD ay addeegsan karaan fasallada, dhismayaasha agabka iyo shaqaalaha dugsiyada tooska ah.


6. WW ee DG-yada waxa ay qaadan doonaan doorka diiwaangelinta, kormeerka, iskudubbaridka iyo maaraynta fuliyeyaasha WAD oo ay ku jiraan kuwa cusub si loo wanaajiyo qaybinta adeegga, helitaanka iyo tayada iyada oo wadashaqayn dhow lala yeelanaya WWH&TS.

7. WW ee DG-yada waxa ay hirgelin doonaan shirka iskuxidhka hawlaha fulliyeyaasha WAD 3 biloodba mar, kaas oo qayb ka noqonaya Kooxda Ka-Shaqaysa Waxbarashada Dadban ee heer Dawlad Goboleed. Ka qeybgalayaasha waxaa ka mid noqon doona saraakiisha Wasaaradda ee u xilsaaran iyo fuliyeyaasha waxbarashada WAD. Kulamadu waxay keenayaan wadashaqayn, wada-qorshayn iyo in xogta la isweydaarsado. Kulamada waxaa lagu martiqaadyadaa fuliyeyaasha ku cusub bixinta adeegga WAD.

8. WWH&TS iyo WW ee DG-yada gudahooda, qaybo WAD u xilsaaran ayaa laga hirgelin doonaa Waaxda WD dhexdeeda si loo xoojiyo iskuduwidda, fulinta iyo horumarinta barnaamijka WAD. Qeybtan waxaa awooddeeda lagu dhisi doonaa taageerada deeq bixiyeyaasha muhiimka ah iyo fuliyeyaasha WAD. Qaybtani waxa ay isku dubaridaysaa howlaha barnaamijyada WAD, si casharo looga qaato waxqabadka barnaamijyada WAD iyo in la dhiso iskaashi lala yeesho saraakiisha waxbarashada maamul goboleedyada si loo xoojiyo bixinta adeegga WAD. Qaybta WAD waxay xoojin doontaa habka hubinta tayada xarumaha WAD taas oo loo marayo kormeer iyo qiimayn sidii hore ka fiican. Qaybtani waxay ballaarin doontaa qaabdhismeedka Waaxda WD iyo barnaamijka WAD heerka qaranka, maamul goboleedyada iyo ilaa heer degmo si la isugu duwo barnaamijka WAD loona kormeero hirgelinta tayada.

9. Hawlaha muhiimka ah ee barnaamijka WAD waxaa lagu dari doonaa jadwalka shaqada waxbarashada ee WWH&TS iyo WW ee DG-yada. Hawlahaas waxaa ka mid noqon kara tababarka baraha; xilliyada isqorista; imtixaannada meelaynta; imtixaannada dhameystirka, u qareemidda iyo ka qeybgalka bulshada. Waxaana la xusi doonaa munaasabadaha muhiimka ah sida Maalinta Dhallinyarada, Maalinta Akhriska Adduunka iyo Maalinta Macallinka.

Jaantuska 2: Qaabdhismeedka maamulka iyo maaraynta shaqooyinka WAD.



## 4.3 Doorka iyo Maasuuliyadaha

**Doorka iyo Waajibaadka Dowladda Federaalka:**

1. Soo saarida siyaasadda, sharciyada, dejinta heerarka, xeerinta, kobcinta awoodda, iskuduwida, dabagalka iyo qiimaynta iyo in caawinaad farsamo la siiyo maamul goboleedyada.
2. WWH&TS waxa ay fududeynaysaa hirgelinta siyaasadda, waxa ayna hubinaysaa in ay jirto awood ku filan xagga dhaqaalaha, ilaha shaqaalaha, xogta WAD iyo kaabayaasha dhaqaalaha.
3. WWH&TS waxa ay abuuri doontaa jawi suurtagelinaya in la xoojiyo iskaashiga u dhexeeya waaxyaha dawliga ah iyo kuwa gaarka loo leeyahay.

**Waaxda Waxbarashada Dadban (WD), Qaybta Waxbarashada Aasaasiga ee Degdega ah:**

1. Hubinta in diiwaanka fuliyeyaasha WAD inuu saxan yahay
2. Hagiggda iyo hubinta tayada ku saabsan qorshaynta, dhaqangelinta, kormeerka, qiimaynta, dejinta siyaasadda iyo u hoggaansanaanta.
3. Hogaaminta siyaasiga ah oo ku saabsan hirgelinta siyaasadda iyada oo loo marayo qorshe iyo xeelado isku dhafan, habraacyo iyo qorsheyaal kale.
4. Urrurinta iyo isugeynta xogta laga soo gudbiyay heer maamul goboleed laguna kaydiyo HMXW.

**Doorka iyo Mas'uuliyadaha WW ee DG-yada**

1. Diwaangelinta iyo siinta ruqsada bixiyeyaasha WAD ee heer dawalad goboleed
2. Aasaasida iyo xoojinta qaybta WAD heer goboleed oo masuuliyadeedu tahay iskudubaridka bixiyeyaasha WAD, kormeer, qiimayn iyo hubinta tayada.
3. La shaqaynta qeybta WD ee WWH&TS dhammaan howlaha ku saabsan WAD.
4. Ku darrida barnaamijka WAD qorshayaasha horumarinta WW, qorshayaasha, xeeladdaha, iyo qorshooyinka fulinta sanadlaha ah.
5. Abaabulida khayraad loogu talagalay WAD, iyo kormeerka iyo qiimaynta.
6. Xulashada bixiyeyaasha WAD iyo fududaynta inay ka qaybgalaan hawlaha.
7. Diyaarinta, qaadista imtixaanta dhamaystirka WAD iyo bixinta shahaadooyinka iyo cadaymaha kale ee ardayda WAD.
8. La wadaagida WWH&TS xogta WAD ee ku saabsan, fuliyeyaasha, bixiyeyaasha, bareyaasha, ardayda iyo arimaha kale ee muhiimka ah sida warbixinada qiimaynta.
9. Daabacada iyo qaybnta agabka iyo qalabka manhajka WAD.
10. Xulashada kuliyadaha fulin doona tababarada WAD.

**Doorka Kormeerayaasha WAD ee Heerka Guddoonka Waxbarashada Gobolka (GWG):**

1. Gacan ku haynta diiwaanka barnaamijyada WAD iyo hubinta inay diiwaangashan yihiin, hubbinta tayada barmaamij kasta oo WAD ah, dib-u-eegista iyo fullinta mirodhalka qiimaynta xarumaha WAD, iyo ka qaybgalka qorshaynta iyo hawlaha urrurinta xogta ee WW ee DG-yada.
2. Gacan ku haynta diiwaanka bareyaasha WAD ee diiwaan gashan, isla markaana shaqada ku jira, sidoo kale inuu dhaqangeliyo mirodhalka ka soo baxa qiimaynta baraha.
3. Ka warbixinta xogta isqorista, joogista iyo dhammeystirka dhammaan barnaamijyada WAD ee Gobolka, warbixintaas oo loo gudbinayo Qaybaha WAD iyo HMXW ee WW ee DG-yada iyo WWH&TS.

4. Soo bandhigida warbixinta saddex-biloodle ah oo ku saabsan WAD shirarka gobollada ee WD ee WW ee DG-yada iyo WWH&TS.
5. Wuxuu ahaanayaa wakiilka farsamo ee heer gobol, degmo iyo heer DG barnaamijyada WAD oo ay ku jiraan hirgelinta manhajka, xeeladaha ku sugnaana dugsiyada ee ardayda iyo horumarinta xirfadaha bareyaasha.
6. Ka qayb qaadashada bixinta tababarka shaqada ka hor iyo kadib marka bareyaashu guda galaan shaqada WAD.

**Doorka Kormeerayaasha WAD ee Heerka Guddoonka Waxbarashada Degmadda (GWD):**

1. Inuu u jiheeyo, kana wacyigeliyo bulshada faa'iidada uu barnaamijka WAD u leeyahay carruurtooda iyo taageerida isqorista ardayda WAD isaga oo kaashanaya GWB.
2. Iskudubaridka xulashada Guddiga Waxbarashada Bulshada (GWB) ee xarumaha WAD.
3. Inuu bixiyeyaasha WAD kala shaqeeyo xulashada goobaha laga hirgelinayo xarumaha WAD iyo shaqaalaynta bareyaasha WAD.
4. Hubinta heshiisyada rasmiga ah ee u dhaxeeya bixiyaha WAD iyo baraha iyo sidoo kale heshiisyada u dhexeeya xarunta WAD iyo bulshada / dugsiga tooska ah ama qofka iska leh dhismaha xarunta WAD.
5. Xoojinta wadashaqaynta iyo habka isu-gudbinta ardayda ee u dhaxeeya xarumaha WAD iyo dugsiyada tooska ah.
6. Haynta iyo ka warbixinta xogta isqorista, joogista, dhammeystirka iyo isu-gudbida dhammaan barnaamijyada WAD ee degmada, xogtaas waxaa loo dirayaa kormeeraha WAD ee heerka xafiiska GWG.
7. Ka qayb qaadashada kormeerida xarumaha WAD, qiimaynta bareyaasha qabashada tababarada kooxaha WAD iyo qorsheynta heer degmo.
8. Baahinta warbixinnada kormeerka, oo ay ku jiraan mirodhalka iyo talaabooyinka lagula taliyay xarunta WAD, warbixnnadaas oo wax lagu kordhinayo booqashooyinka dambe.
9. Aqoonsiga, xidhiidhinta iyo ka qayb qaadashada tabobarada iyo taageerada xirfadeed ee la siinayo bareyaasha.
10. Hawl fududaynta isu-gudubka ardayda ka qalin jabiyey WAD ee loo wareejinayo dugsiyada rasmiga ah iyo ururinta xogta dhammaan wareegitaanka ardayda.
11. Qoondaynta iyo soo saarida miisaaniyadda xarumaha WAD ee heer degmo.

**Doorka Deeq Bixiyeyaasha:**

1. Maalgelinta hawlaha lagu dhaqangelinayo barnaamijyada WAD oo wareegga buuxa ah (ugu yaraan 4 sano).
2. Qaadashada ogolaanshaha WWH&TS ee barmaamijyada WAD iyo in ay heshiis ku galaan hawlaha WAD ee ay maalgelinayaan ka hor inta aan mashaariicdu bilaaban.
3. Inay helaan warbixino joogto ah oo ku saabsan barnaamijyada WAD.
4. In ay dawladda talo ka siiyaan waxyaalaha hagaajinta u baahan sida isbeddelka xeeladaha iyaga oo soo marinaya Guddiga Bahda Waxbarashada (GBW).
5. Wixii taageero kale ah ee loo baahdo.

**Doorka Fuliyeyaasha WAD ee aan Dawliga Ahayn:**

Bixiyeyaasha aan dawliga ahayn ee WAD waa in ay baahiyaan waxqabadka iyo helitaanka WAD, kana qayb galaan maalgelinta, dhaqangelinta, kormeerka iyo qiimaynta barnaamijyada WAD. Waxaa kale oo doorkooda ka mid ah:

1. Maaraynta xirfadlayaashooda waxbarasho meelaha ay ka hawlgalaan iyaga oo adeegsanaya sharciyada u degsan wadanka iyo kuwa caalamiga ah ee khuseeya xaaladda Soomaaliya.
2. Heshiis la saxeexdaan WWH&TS ama WW ee DG-yada, iyada oo lagu heshiinayo meelaha laga hirgelinayo WAD ka hor inta aanu shaqada ama mashruucu bilaabmin, waana in mashaariicdu leeyihiin qorshe waaritaan.
3. Wadashaqayn iyo isku xidhnaan la yeelanayaan WWH&TS iyo bixiyeyaasha kale ee WAD, waxayna ka qeyb qaataan shirarka WWH&TS iyo WW ee DG-yada iyo kulamada kale.
4. Hubinayaan in dhammaan xarumaha WAD iyo bareyaasha WAD ay ka diiwaan gashan yihiin WWH&TS iyo WW ee DG-yada.
5. Isku xidhnaan la yeelanayaan WW marka la xulanayo xarunta WAD, (GWB) iyo baraha.
6. Addeegsadaan manhajka iyo agabyada tababarka ee xarumaha WAD ee WWH&TS ansixiyay.
7. Taageeraan soo saarida iyo bixinta buugaagta akhriska iyo agabka waxbarashada ee WAD.
8. Taageeraan horumarinta xirfadeed ee bareyaasha iyo Guddiyada Waxbarashada Bulshada (GWB) iyada oo la adeegsanayo agabka ay ogolaatay WWH&TS iyaga oo kaashanaya urrarada ay WWH&TS aqoonsan tahay, waxayna taageero iyo caawimaad ka helayaan Guddoonka Waxbarashada Gobolka iyo Degmada (GWG iyo GWD).
9. Bixinta taageero farsamo oo lagu kobcinayo awoodda WWH&TS, WW ee DG-yada, GWG iyo GWD iyada oo la waafajinayo ujeeddooyinka Siyaasadda WAD.
10. U qareemidda awood siinta bulshada iyo dhisida awooddaha qaabdhismeedka maaraynta WAD sida Guddiga Waxbarashada Bulshada (GWB).
11. Taageerida dhismaha, dayactirka iyo qalabaynta xarumaha WAD oo ah meelo ay bedqab ka helayaan ardayda WAD.
12. Si buuxda oo bulshadu uga qayb qaadanayso aasaaska iyo socodsiinta xarumaha WAD iyada oo la hubinayo in ka qeybgalka bulshadu uusan ku xadidneyn shaqada dhismaha iyo keenista agabka deegaanka laga heli karo.
13. Bixinta taageero maaliyadeed, qalab iyo farsamo ku aaddan dejinta iyo hirgelinta habraaca kormeerka iyo iskuxidhka WWH&TS, WW ee DG-yad iyo inay si joogto ah u kormeeraan howlaha WAD.
14. Si firfircoon uga qayb qaataan u qareemidda iyo dhiirrigelinta barmaamijyada WAD ee la gaadhsiinayo carruurta iyo dhallinyarada dugsiyada ka maqan (CDhDM) iyo arrimaha muhiimka ah ee saameeya WAD iyada oo lagu saleynayo caddaynta cilmi baarista iyo xogta ka soo baxday dhaqangelinta mashaariixda.

**Doorka iyo Mas'uuliyadaha Hay'adaha Tababarka iyo Cilmi Baarista**

Jaamacadaha iyo kuliyadaha bixiya tababarada waxbarashada waxay;

1. Ku darayaan barnaamijka WAD manhajkooda tababbarka oo u dhigma heerarka qaranka iyo kuwa caalamiga ah.
2. Taageerayaan dhisida awoodda farsamo ee bareyaasha WAD, GWG, GWD iyo (GWB).
3. Samaynayaan cilmi baaris ku qotonta guud ahaan maaraynta iyo habka waxbarista iyo barashada ee WAD, isla markaana jawaab iyo talooyin wax ku ool ah ku soo celin doonaan WWH&TS iyo bixiyeyaasha kale ee WAD si jawaab celintaas loogu adeegsado dib u eegista iyo hirgelinta siyaasadda.
4. Sameeyaan shirar balaadhan oo lagu soo bandhigo mirodhalka, xogta iyo talooyinka ka soo baxay cilmi-baarista.

**Doorka Dugsiyada Gaarka loo Leeyahay**

1. La shaqaynayaan fuliyeyaasha WAD, iyaga oo u ogaalanaya in xarumahooda, qalabkooda iyo shaqaalahooga loo addeegsado fullinta WAD.
2. Ka qayb qaataan baahinta adeega WAD si loo gaadhsiiyo qoysaska dakhligoodu hooseeyo.
3. Si dhow ula shaqeeyaan WWH&TS iyagoo bulshada ka qaybgelinaya maamulka WAD.
4. Hubinayaan in tayada WAD gaadhsiisan tahay heerarka qaranka.

5. Xaqiijinayaan in heerarka tacliinta iyo xirfada ee bareyaasha la xaqiijiyo.
6. Ka qayb qaataan diyaarinta, daabacaadda iyo qaybinta buugaagta akhriska iyo agabyada kale ee waxbarashada.

**Doorka iyo Masuuliyadaha Madaxa Bareyaasha ee Xarunta WAD**

1. Xidhiidh shaqo ayuu la leeyahay bulshada si ay carruurta iyo dhallinyarada ku haboon looga diiwaangeliyo barnaamijka WAD, wuxuuna qaadayaa imtixaannada meelaynta/fadhiisinta.
2. Hoggaaminta Guddiga Waxbarashada Bulshada (GWB) oo si firfircoon ula xiriiraya bulshada.
3. Kor-joogtaynta tayada waxbarista ee xarunta WAD.
4. Dhiirrigelinta deegaan waxbarasho ku habboon oo aamin ah in ay helaan ardayda WAD.
5. Haynta diiwaanadda saxda ah ee isqorista, meelaynta, waxqabadka ardayda iyo xaadiritaanka ardayda iyo bareyaasha.
6. Soo gudbinta dhammaan xogta looga baahan yahay WAD isaga oo gaadhsiinaya WW ee DG-yada, WWH&TS iyo HMXW.
7. Dib u eegista qorshaha casharada iyo u kuurgalka fasalka dhexdiisa, dibna jawaab iyo talo bixin ku celiyaa baraha iyo ardayda.
8. Ka qayb qaataa waxbarista ardayda WAD.

**Doorka iyo Masuuliyadda Guddiga Waxbarashada Bulshada (GWB)**

1. Ka qayb qaadasho firfircoon ee maaraynta xarunta WAD, fulinta hawlaha, qorshaynta, kormeerka iyo qimaynta (M&E).
2. Ka qayb gelinta qaybaha bulshada si ay u caawiyaan xulista iyo isqorista ardayda, helida goobta laga furayo xarunta WAD, agabka xarunta WAD u baahan tahay, xullista baraha iyo ka qaybgalka howlaha kale ee WAD.
3. Ka qaybgalka tababarka (GWB).
4. Ogolaanshaha jadwalka hawlaha xarunta WAD iyo saacadaha fasal ama waxbaristalka iyaga oo kala heshiinaya ardayda iyo baraha.
5. Dhiirrigelinta isqorista, ku sugnaanta dugsiyada ee ardayda, dhammaystirka barnaamijka WAD, la socoshada maqnaanshaha baraha iyo ardayda.

**Doorka iyo Waajibaadka Warbaahinta**

Warbaahinta guud ayaa door muhiim ah ka ciyaari doonta u qareemidda wanaagsan ee Waxbarashada Aasaasiga ee Degdega ah (WAD) oo loogu talogalay carruurta iyo dhallinyarada dugsiyada ka maqan (CDhDM).

### 4.4 Hubinta Tayada iyo Kormeerka (K&Q)

1. Ujeedadda habka hubinta tayada waa in lagu kaabo bixinta adeegga WAD oo tayo sare leh loona siman yahay guud ahaan Soomaaliya. WWH&TS waxay diyaarin doontaa qaabdhismeedka Hubinta Tayada (QAS) ee barnaamijka WAD kaas oo dib-u-eegis habaysan ku samaynaya barnaamijyada waxbarashada iyo geeddi socodka si loo ilaaliyo loona hagaajiyo tayadooda, sinnaanta iyo waxtarkoodaa. Habka Hubinta Tayada (QA) waxaa ku jiri doona in xarunta WAD qiimayn isku samayso, qiimaynta kor kaga imanaysa xarunta (oo ay ku jirto kormeerka), qiimaynta bareyaasha iyo madaxa bareyaasha iyo qiimaynta ardayda.

2. Qaabdhismeedka hubinta tayada waxaa ku jiri doona shahaaddo siinta dhammaan heerarka WAD gaar ahaan dhammaystirka Heerka 4aad, taas oo xaqiijinaysa in ay la sinnaadaan shahaadada dugsiga tooska ah si loogu oggolaado u wareegida waxbarashada tooska ah.

3. Habka Hubinta Tayada (QAS) waxaa lagu qiimayn doonaa dhammaan bixiyeyaasha WAD.

4. WWH&TS waxay dhisi doontaa guddi hawleed qaabilsan habraacyada hubinta tayada (QAS) gudigaas oo diyaarinaya habka (qoraallada iyo habraacyada) loo addeegsanayo hagaajinta barista iyo barashada iyada oo ujeeddadu tahay in la taageero gaaritaanka mirodhalka ugu wanaagsan ee ardayda WAD.

8. WWH&TS, WW ee DG-yada, hawlwadeenada GWG, hawlwadeenada GWD iyo xarumaha WAD waxaa la siin doonaa tababar ku saabsan qaabdhismeedka hubinta tayada (HHT) iyo qoraallada ku habboon si ay u hubin karaan tayada xarumaha bixiyaha WAD.

## 4.5 Baahinta Siyaasadda iyo u Qareemidda WAD

1. In la soo saaro, lana baahiyo nuqulada siyaasadda WAD, laguna daabaco shabakada internet-ka, waana in laga heli karo xafiisyada iyo barta internet-ka ee WWH&TS iyo WW ee DG-yada.

2. In la diyaariyo, lana fuliyo qorshe fariin gudbin ah oo lala kaashanayo saraakiisha xiriirka dadweynaha iyo isgaarsiinta si loo beddelo fikradaha ay shaqaalaha waxbarashada iyo dadweynuhu ka qabaan barnaamijka WAD.

3. In la diyaariyo, lana dhaqangeliyo xeelad u gaar ah u qareemidda siyaasadda WAD. Ujeedadda hoose ee xeelada u qareemidda waa hubinta in WWH&TS iyo WW ee DG-yada diiradda saarayaan WAD iyada oo lagu dabakhayo laguna dhexdarayo qorshayta, dhaqangelinta, kormeerka iyo miisaaniyadda. Intaa waxaa dheer, xeeladda u qareemidu waxa ay kor u qaadaysaa in wasaaradaha ay khuseyso, ganacsatada, hay'adaha iyo deeq bixiyeyaasha ay arkaan qiimaha iyo muhiimadda uu leeyahay barnaamijka WAD.

## 4.6 Abaabulka Kheyraadka

1. Dhammaan daneeyayaasha WAD: sida bulshooyinka, bixiyeyaasha WAD, DFS, Dawlad Goboleedyada, iyo la-hawlgalayaasha waa in ay hawlaha WAD u diyaariyaan khayraad maaliyaddeed, qalab, farsamo iyo shaqaale.

1. Barmaamijyada WAD wax lacag ah ama khidmada dugsiga ah lagama qaadayo, waxaana maalgelinaya WWH&TS, WW ee DG-yada, deeq bixiyeyaasha, bulshada ama fuliyeyaal kale.

2. Bixiyeyaasha WAD kama dalban karaan ardayda in ay xidhaan lebis gaar ah.

3. Waxtarnimada WAD waxaa kor loo qaadi karaa marka la isugeeyo, lana wada adeegsado kheyraadka la hayo. Waa in la dhiirigeliyaa addeegsiga khayraadka la haysto sida dugsiyada tooska ah, xafiisyada, goobaha hay'adaha kale iyo maamulka shaqaynaya ee dugsiyada.

4. Macallimiinta ka shaqeeya dugsiyada tooska ah waxaa laga codsan karaa in ay bixiyaan adeegga WAD waxaana lala gelayaa heshiis.

7. Kheyraadka deegaanka laga heli karo waa in looga faa'iidaystaa kaabida barnaamijka WAD sida xarumaha bulshada iyo dadka kartida ama aqoonta leh ee bulshada ka midka ah.

### 4.7 Iskaashiga Dawalada iyo Dhinacyada Gaarka ah

1. WWH&TS waxa ay xoojinaysaa iskaashiga urrarada dalka iyo kuwa caalamiga ah, deeq bixiyeyaasha iyo dhinacyada gaarka ah sida ganacsatada si loo maalgeliyo loona hirgeliyo mashaariicda WAD, taas oo yarayn doonta tirada carruurta iyo dhallinyarada dugsiyada ka maqan, korna u qaadi doonta mirodhalka barashada ee ardayda da'adoodu weyn tahay.

2. WWH&TS, WW ee DG-yada iyo bixiyeyaasha WAD waxay raadin doonaan taageerada iyo ka qaybgalka ganacsatada iyo hay'adaha aan dawliga ahayn (marka ay ku habboon tahay) si ardayda dhamaystay WAD loo siiyo shaqo barasho xagga xirfadaha ah, iyo shaqo siin ka dambaysa si ay noqdaan kuwo isku filan.

3. WWH&TS waxa ay samayn doontaa xeeladdo lagu hagaajinayo wadashaqaynta iyo iskaashiga dhexmaraya dawladda iyo shirkadaha gaarka loo leeyahay.

# 5. CUTUBKA SHANAAD: DIB U EEGISTA IYO WAX-KA-BEDDELKA SIYAASADDA

Siyaasadda WAD ee 2021 ayaa beddeleysa dhammaan siyaasaddaha qabyada ah ee jira. Siyaasadda WAD waa qaab hagitaan loogu talagalay qorshaynta xeeladaha, waxa ayna ka tarjumaysaa xaaladda carruurta iyo dhallinyarada dugsiyada ka maqan ee guud ahaan Soomaaliya.

MoECHE waa in ay dib u eegis ku samaysaa siyaasadda WAD shantii sano hal mar si loo hubiyo in siyaasaddu ay mar kasta ahaato mid ku habboon isbeddelada xaaladaha qaranka iyo kuwa caalamiga ah.